# CILMIGA BULSHADA

## Tilmaame Bare

## Fasalka 5$^{aad}$

ISBN 978-99944-2-115-2

JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 47.60

CILMIGA BULSHADA Tilmaame Bare Fasalka 5$^{aad}$

MOE

# CILMIGA BULSHADA

## Tilmaame Bare

## Fasalka 5$^{aad}$



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

# CILMIGA BULSHADA

## TILMAAME BARE

### FASALKA 5$^{AAD}$

Qorayaasha Tafatirayaasha:

Cabdlcasiis Maxamed Aadan (Baaruud)
Cali Muxumed Bakaal

Qiimeeyayaasha:

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal

JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA
ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA

Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qoodista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka. No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb galay daabicista iyo soo bixitaanka buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

ISBN 978-99944-2-115-2

# Tusmada Buuga

## Cutubka 1^aad^


**Dadka, Meelaha Ay Dhacaan Iyo Daaganka Itoobiya Iyo Geeska Afrika..... 1**

1.1 HALKA AY DHACAAN DALALKA GEESKA AFRIKA........... 2

1.2 TAARIIKHDA DADKA IYO DAGAANKA ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA .................... 3

1.3 QARAMADII UGU HOREEYAY EE ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA .................... 7

1.4 XAALADAHA SALDHIGA U AH KALA DUWANAANSHAHA DAGAAMEYNTA IYO HAB-NOLALEEDKA .................... 11


## Cutubka 2^aad^


**Dhulka Iyo Waxa Ku Xeeran................. 15**

2.1 MEESHA AAN KU NAALLO (DHACNO).................................. 18

2.2 QAABKA DHULKA, DHAQAAQA IYO SAAMEYNTIISA.......... 22

2.3 SAAMEYNTA AY XILLIYADU KU LEEYIHIIN BEER QODASHADA IYO XOOLA DHAQASHADA......................... 26

# CUTUBKA 3AAD


## DEEGAANKEENA.................................... 31

**3.1** NOOCYADA WAA WEYN IYO KUWA WAXTARKA LEH EE DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH........................................ 31

**3.2** WAXTARKA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH.................................... 34

**3.3** SAAMEYNTA AY DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKU KU LEEDAHAY DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR-JOOGTA AH.................................... 37

**3.4** DHAWRIDDA DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUUR JOOGTA AH.................................... 40


# CUTUBKA 4AAD


## ARIMAHA DADWEYNAHA......................... 44

**4.1** ARRIMAHA BULSHADA........................................................ 46

**4.2** SAAMEYNTA DHAKHSA U KORADHKA TIRADA DADKA........52

**4.3** MAAMULKA SUUBAN, XUQUUQDA CARUURTA, SHILALKA IYO BADBAADADOODA........................................ 56

Muqaraka Fasalka 5aad ee Cilmiga Bulshada................ 60

# CUTUBKA 1 DADKA, MEELAHA AY DHACAAN IYO DAAGANKA ITOOBIYA IYO GEESKA AFRIKA

## Ujeedada Guud ee Cutubka

***Marka uu dhamaado cutubkan kadib ardayda waxay awoodi doonaan inay***

- *Muqaal ku muujiyaan daris ahaan halka uu dhaco Geeska Afrika.*
- *Magacaabaan wadamada uu ka kooban yahay Geeska Afrika*
- *Sawiraan halka ay Itoobiya deris ahaan dhacdo (kutaalo)*
- *Tilmaamaan caasimadaha dalalka Geeska Afrika*
- *Qiraan jiritaanka diimaha waa weyn ee ay qarniyada badan ka jireen Geeska Afrika gaar ahaan Itoobiya*
- *Garwaaqsadaan gulihii kala duwanaa ee qaramadii (dowladihii) hore ee Geeska Afrika, gaar ahaan Itoobiya*
- *Ogaadaan sida ay u awood badneyd Itoobiya xiliyadii hore*
- *Fahmaan himilooyinka ugu muhiimsan Ilbaxnimada cusub*
- *Aqoonsadaan kala duwanashaha dagaanka, dhaqanka iyo nolasha dadka kunool dhulalka jooga sare iyo kuwa jooga hoose iyo miyiga iyo dadka dadka magaalada ee dalkeena Itoobiya.*

Buuga baruhu maaha mid uu wax walba ku dhamaystiran yahay haseyeeshee wuuxuu ku hagayaa baraha nidaam inta badan ku salaysan ka qeybgalka ardayga.

# 1.1 Halka ay dhacaan dalalka Geeska Afrika

**Waqtiga looqoondeeyay 4 xisadood**

## 1. Natiijooyinka Cutub Yaraha

***Casharkani marka u dhamaado dabadeed ardaydu waa a'n ay***

- *Cadeeyaan barta ay ku taalo geeska Africa*
- *Si quman u meeleeyaan oo ay u qoraan melayawga wodamada*
- *Magacaabaan wadamada geeska Africa*
- *Muujiyaan barta ay Itobia kaga laalo geeska Africa iyda oo la la xidiidhinayo wadamada dariskeeda*
- *Cadee yaan meela yawga magaalooyinka.*

## 2. Arraar

Jibuuti, Ertira, Itobiya iyo Somaliya waa wadamada geeska Africa.

Wadamada geeska Africa waa wadamo wakhti dheer bartilmaameed u ahaa xogaga waa weyn'oo qalbigooda soo jiidan jiray. Sabatuna waxay tahay in meesha ay wadamadu ku yaaliin oo ah rug istiraateeji ah oo isku xidhiidhiya gobalada Medtiraniyaanka iyo Badweynta Indiya.

Waxa intaa sii dheer in geeska Afrika u yahay wadadu ugu gaaban ee u dhaxaysa yurub iyo Bariga fog. Marinka suwiis kanaal markii sanadkii 1869 la furay dabadeedna muhimada geeska Afrika wuu sii kordhay

Waxay wadamada Geeska Afrika caan ku yihiin khilaafaadka iyo iskudhac aan dhamaanin.

## 3. Habka Baris – Barahso

### 3.1 Kaabayasha loo adeegsanayoo baraista Cutubka

- Khariidada wadamada
- Glob
- Qoraal yoo la xidhiidha su wiis kannal

## 3.2 Talooyinka iyo habka wax loo barayo

wadahadalo dood bandhigid

## 3.3 Casharo Diyaarin

- Isku duba ridista qalabyada wax lagu barayu
- Kooxayn
- Doorashada qodobada la xidhiida
- Ka qyb qaadashada ardaydu oo la ilaaliyo

## 3.4 Sobandhigida Casharka

**b. Gogol dhiga cahsarka**

casharka intaadan bilaabin su'aalo waydii ardayda.

# 1.2 Taariikhda Dadka Iyo Dagaanka Itoobiya Iyo Geeska Afrika

**Xiisadaha 11**

## 1 Ujeedada gaarka ah

***Marka uu cashirkan dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-***

- *Ogaadaan Itoobiya inay tahay asalkii bini'aadamka Abuurkiisu ka bilowday*
- *Aqoonsadaan goobaha ugu mihiimsan ee dhaxalka Itoobia iyo Geeska Afrika*
- *Xafidaan aataarta la daahfuray*
- *U kala soocnaato siday u kala horeeyeen hadhaayada ama qalfoofyada la daahfuray*
- *Sharaxaan goorta iyo siday ku soo galeen diinta Kiristaanka (Masiixiga) iyo ta Islaamka Itoobiya iyo Geeska Afrika*
- *Aqoonsadaan Itoobiya inay tahay wadan ay ka jiraan diimo kala duwan*
- *Aqoonsadaan isudulqaadashada soo jireenka ah ee dhanka diimaha Itoobiya.*

## 2 Tusmooyin

- Halka uu asalkii hore ee bani'aadamku ka soo jeedo
- Soo galitaankii diinta Kiristaanka iyo diinta Islaamka.

## 3 Araar

- Asalkii hore ee bini'aadamku waxay ka dhigan tahay abuurkii hore ee binimaadamka meeshuu ka bilowday.
- Argatida diimuhu waxay aaminsan yihiin in biniaadamka uu Alle abuuray.
- Aragtida Saynisyahanadu waxay xambaarsan tahay in uu bini'aadamku abuurmey kadib markuu soomaray Habab iyo qaabab badan.
- Inuu ka bilowday unug yar, kadibna uu isu badaley noole lagu magacaabo Hoomosaabiyaansi.
- Hoomo Habilas, Hoomoo iraktas iyo Hoomoo Saabiyaansi waxay ka soo jeedaan hal unug oo ah unuga qoyska Hoomoo (unuga reer Hoomoo)

| **Qeybo Ka mid ah goobihii Aataartii reer Hoomoo ee Itoobiya (Afrika)** | |
|---|---|
| Nooc ama jaadka | Goobihii Aataarta ee Itoobia |
| Hoomo Habilas | • Wabiga oomo (Itoobiya) waadiga oldufay (Tansania)<br>• Istarka fantayn (koonfur Afrika) Harada Turkaana (Kiinya) |
| Hoomo Iraktas | • Wabiga oomo Badhtamaha wabiga Awash, Malkakunture, Koonso gaarduula iyo Gadalis (Itoobiya) |
| Hoomo Saabiyans | • Badhtamaha Awash ee Bado Kibish oo ah Wabiga oomo dhiniciisa hoose, Dire dhaba. |

**Fiiro-gaar ah:-**

Waxaa jira goobo kale oo aataar ahaaneed oo muhiim ah oo laga daahfuray meelo badan oo Afrika ka mid ah:-

- Diinta Islaamka iyo kiristanka ayaa ah labada ugu waaweyn Itoobiya
- Labada diimoodba waxay Itoobiya kasoo galeen dhinaca Bariga Dhexe.

## 1.2.4 Hababka Baris Barasho

**B. Adeegsiga kaabayaasha barista**

- Sharraxaad
- Soo bandhigid ama tusid (muuqaal ku muujin)
- Dood
- Dood kooxeed (koox- koox isu qeybin)
- Su'aalo iyo jawaabo

**T. Adeegsiga hababka wax-dhigista**

- Khariirada Afrika (khariirad siyaasadeed)
- Khariirad gacmeeda Geeska Afrika
- Khariirada wadada diyaarada ee Itoobiya Ayr Laan.

**J. Diyaar garowga cashirdiyaarinta ka hor.**

- Barow udir ardayda shaqo (howl) qoraal ah oo gooni gooni iyo koox-kooxba ka kooban.
- Barow soo ururi sawirada qoyska reer Hoomo gaarahaan Luusi (Lucy) Salam iyo Ardi(Ardy)
- Barow hadii uu jiro aagiina matxaf (guriga dhaqanka) ama meelo Taariikhi ah booqadsii ardayda kadibna warbixin ha kasoo diyaariyaan.
- Barow sii shaqo guri oo ay koox – koox u qeybi, hana soo diyaariyaan warbixin ku saabsan siday diimaha waa weyn ku soogaleen Itoobiya.

**Kh Soobandhigida cashirka.**

**B. Hordhaca cashirka**

Barow ku bilow cashirka su’aalahan soo socda.

1. Maxaad ka taqaanaa Geeska Afrika?
2. Wadamadee ayuu Geeska Afrika ka kooban yahay?
3. Dalkeena Itoobiya maka mid baa Geeska Afrika?
4. Wax maka sheegi kartaan halka uu ka bilowday Abuurka bini’aadamku?

**T. Gudagalka cashirka.**

Isla falanqeeya (Ka wada hadalka) faraqa u dhexeeya Aragtida saynis yahanada iyo aragtida Abuurida Alle ee ku aadan bani’aadamka asalkiisiisa.

## 1.2.5 Qiimeynta iyo dabagalka

- Barow waydii ardayda in ay magacaabaan wadamada Geeska Afrika iyo caasimada hooda.
- Barow ardayda u fasax in ay koox-koox uga wada hadlaan caddadka tirada dadka kunool wadamada Geeska Afrika, kadibna ha u soo bandhigaan fasalka qiyaastooda.
- Barow sii su’aalo naqtiin ah oo ay guryahooda kaga soo sheeqeeyaan.
- Barow koox-koox u qeybi oo u dir inay soo sawiraan khariirad muujinaysa Geeska Afrika iyo halka uu daris ahaan kuyaalo.
- Biyaha badaha waa weyn ee uu Geeska Afrika la wadaago xadadka (sida Badweynta hindiya, Badda cass iyo Gacanka cadmeed).

**Dabagalka**

U dir ardayda in ay warbixin kooban oo ku saabsan Luusi sooqoraan.

**Tixraac**

# 1.3 Qaramadii Ugu Horeeyey Ee Itoobiya Iyo Geeska Afrika.

## 1 Ujeedada gaarka ah ee cashirka

***Cashirkan Markuu dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi daanaan inay:***

- *U bogaan una maqsuudaan jiritaankii qaramadii hore ee Itoobiya iyo Geeska Afrika*
- *Cadeeyaan itoobiya inay ahaan jirtey dawlad quwad badan*
- *Lahaadaan dareen wadaniyadeed ama wadaninimo.*

## 2 Tusmooyinka

### 1.3.2.1 Guulaha taariikheed iyo siyaasadeed ee la gaadhey

**Waa 3 xiisadood**

### 1.3.2.2 Muhimadii iyo casriyeyntii ama ilbaxnimadii

**5 xiisadood**

## 3 Araar

Qodashada beeraha iyo baayacmushtarka ayaa kamid ahaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee keena (ka dambeeyay) qaramo badan oo dunida iyo geeska Afrika kamid ah.

Qaramadii ugu horeeyey ee kajiray guud ahaan geeska Afrika gaar ahaan Itoobiya waxaa ka mid ahaa.

- Dhulkii uduga (punt)
- Dhaamoot
- Aksumayt
- Saldanadihii Islaamiga ahaa
- Wolayta
- Daamot
- Inarya iyo Lima
- Kafaa

Soo gelidii diinta Islaamka ay soo gashey geeska Afrika waxaa xigay samaysitaanka saldanadihii Islaamiga ahaa ha. Dowladaha islaamiga ah waxay Geeska Afrika ka abuurmeen qarnigii sagaalaad ciise dabadii.

Waxaa u talin jiray suldaamo (magacsharafeedka hogaamiyayaashii Muslimiinta)

Saldanadaha Islaamiga waxaa kamid ahaa

- Shawa
- Ifaat
- Adhaal (Adal)
- Fataagar
- Baali iyo kuwo kale

Waxqabadka dhaqaale ee ugu weyn ee ay ku tiirsanaayeen wuxuu ahaa:-

- Beeraha iyo
- Baayacmushtarka

Midnimada ayaa keentay guulahii iyo casrinimada ama (Ilbaxnimada)

Guushii cadwa waxay aheyd Midhihii midnimada adkeyd ee dadkii Itoobiya.

Ilbaxnimada iyo casriyeynta Itoobiya waxaa sababteeda lahaa Boqor Minilik 2(II)

## 1.3.4 Hababka Baris Barasho

**B. Adeegsiga kaabayaasha barista**

- Tusid (muuqaal ku muujin)
- Sharraxaad
- Shaqo kooxeed
- Dood
- Kawada hadlid (isla falanqayn)
- Su’aalo iyo Jawaabo.

**T. Adeegsiga hababka wax-barista**

- Khariirada Afrika iyo Itoobiya
- Khariirad muqaalkii dagaalkii cadwa muujinaysa

- Sawiro iyo muuqaalo ay ku sawiran yihiin geesiy aashii dagaalkii cadwa (Adhwa).
- Khariirado ay ku yaalaan muuqaaladii qaramadii ugu horeeyay Itoobiya
- Khariirad muujinaysa dhulka carabta iyo wadadii ay usoo martay diinta islaamku Geeska Afrika iyo Itoobiya

**J. Diyaargarowga cashirka Hortii**

- ✓ Barow u dir howl ama shaqo guri
- ✓ Diyaari khariirad fudud oo waydii ardayda inay tilmaamaan qaramadii ugu horeeyey Geeska Afrika iyo Itoobiya halka ay ku yaaleen.
- ✓ Sawir khariirada wadadii baayac mushtarka taa soo mujinaysa (na tusaysa) saldandilii Islaamiga ahaa ee ka jiray Geeska Afrika iyo Itoobiya.
- ✓ Barow u qaybi ardayda koox-koox tira yar kadibna hakawada hadlaan dowladihii hore ee Daamot iyo Aksuum, kadib fasalka ha kasoo jeediyaan warbixintooda
- ✓ Barow udir shaqo kooxeed oo hasoo ururiyaan gulihii iyo horumarkii ay gaadheen qaramadii hore ee Itoobiya, kadibna waxbixiintooda ha kasoo jeediyaan fasalka
- ✓ Barow same koox islafalanqeysa hadasha Gadaalkii cadwa. Kuna dhiirigaliainay aqoonsadaan waxyaabihlii caawiyey ee u horiseeday gushii wayneyd ee Itoobiya.
- ✓ Barow u dir shaqo (howl) taasoo ay ardeydu kusoo ururinayaan sida iyo habka ay ilbaxnimadu ay uga hirgashay Itoobiya qarnigii 19aad ilaa 20aad

**B. Hordhaca Cashirka**

Barow waydii su'aalaha soo socda inta aadan cashirka bilaabin

1. maxaad ka ogtihiin ama ka taqaanaan dhulkii la odhan jiray dhulkii uduga iyo Boqortooyadii Daamot.

2. Maxaa sababey ayey idinlatahay samaysitaankii qaramadii hore ee itoobiya?
3. Sheega qaar ka mid ah qaramadii hore ee ka jiray guud ahaan geeska Afrika, gaar ahaan Itoobiya?
4. Sheega magacyada qaar ka mid ah saldanadihii Islaamiga ahaa EE ka jiray Itoobiya?
5. Maxaa kamid ahaa guulihii horumarineed ee boqortooyadii Aksuum?
6. Waa maxay casriyeeyn?
7. Goorma ayey casriyeyntu ka bilaabantey itoobiya?

**t. Nuxur ka Cashirka**

Qaramadii ugu horeeyey Itoobiya iyo Geeska Afrika waxaa kamid ahaa dowladii dhulka uduga (punt), Aksuum, saldanadilii Islaamiga walleyta, Daamot, inarya iyo Keffa.

## 1.3.5 Qiimaynta iyo Dabagalka

**b. Qiimeynta**

Afka ka waydii inay sheegaan qaar kamid ah guulihii horumarka ay gaadheen qaramadii hore ee dalkeena itoobiya.

- U dir shaqo fasal oo waydii inay sheegaan muhiimada iyo waxtarka uu lahaa dagaalkii Adwa.
- Shaqo kooxeed ha ku soo sawiraan khariirad ay ku muujinayaan qaramadii hore ee Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Barow waydii Ardayda waxyaabihii casriyeynta itoobiya sababey ama keeney.

**t. Dabagal ha socodka**

Barow waydii ardayda inay qoraan waxtaradii ugu muhiimsanaa ee ilbaxnimadu Aksum?

**Tixraac**

# 1.4 Xaaladaha Saldhiga U Ah Kala Duwanaanshaha Dagaameynta iyo Hab-Nolaleedka

**Xiisadood 3**

***Ku bilow howlgalkan***

1. Waa maxay dagaameyntu? Sidee?
2. Cimiladu miyey ku leedahay wax saameyn ah dagaameynta? Sidee?
3. Muxuu yahay habnololeedkau?
4. Meel side ah ayaad jeceshahay inaad ku noolaato? Ma dhulka jooga sare Mise dhulka jooga hoose?
5. Ma miyiga mise magaalada?

**Araan**

- Dagaamadu waxaa weeye qaabka ay dadku ugu noolyihiin ama u daganyihiin meel kamid ah dhulka.
- Dhaqanku waa qaab nololeed bulsho, waa guud ahaan caadooyinka iyo caqiidada ay leeyihiin ama wadaagaan dad meel gaar ah dagan.
- Qodobada ugu waa weyn ee sababa kala duwanaashaha dagaamada waxaa loo qaybiyaa 2 qeybood oo waa weyn, waxayna kala yihiin.
  1. Qodobo ama (Arimo) Dabiici ah
  2. Iyo kawo dad samee ah
- Hab nololeedka dadka iyo dhaqanku waa labo shay oo aad iskula xidhiidha.
- Dhaqanka dadku wuxuu sameeyaa hab nololeedka sidoo kale habnololeedkuna wuxuu saamayn ku leeyahay dhaqanka;

**Adeegsiga hababka wax barista.**

- Muuqaal ku muujin
- Kawada hadlid (isla falanqayn)
- Sharaxaad iyo qeexid (weedhaha)
- Ka doodida qodobada muhiimka ah sida nolosha miyiga iyo ta magaalada iyo mida dhulka jooga sare iyo dhulka jooga hoose
- Su’aalo iyo jawaabo

**Adeegsiga kaabayaasha wax-barista**

- Khariirada muuqaalka Itoobiya
- Khariirada ku saabsan baahsanaanta ama ku kala firidhsanaanta dadke ee itoobiya muuqaalo tilmaamaya ku kala baahsanaanta dhaqaalaha ku salaysan qaab (Hab) nololeedka dadka.

**Diyaargarowga cashirka Hortii**

- Udir ardayda inay soo aruuriyaan maclumaad ku saabsan cimilada kadibna kasoo jeediyaan fasalka.
- U qeybi ardada fasalka 4 kooxood, kooxiba ha matasho (ha u taagnaato)
- Dagaan miyi ah oo ku yaala dhul jog sare leh, magaalo ku taalla dhul jog sare leh, miyi ku yaala dhul jog hoose leh iyo magaalo ku taalla dhul jog hoose leh.
- Barow waydii ardayda in ay khariirada karkeeda ka tilmaamaan ama ay calaamadiyaan dhulka ay matalayaan,
- Ku dhiirigali in ay islafalanqeeyaan cimilada dagaanka ay matalayaan (u taaganyihiin) waydii dhulka ama dagaanka ay koox walba u taagantahay iyo Hab nololeedka dagaanka ay matalayaan,

## Qiimaynta iyo ha socodka

1. Barow ardaydu ha islafalanqeeyaan Guryeynta sida ay cimiladu saameynta ugu leedahay.
   - Guryeynta
   - Beeraha
   - Xoolo Dhaqashada
   - Baayacmushtarka
   - Dhaqanka dhulka jooga sare iyo dhulka jooga hoose.
2. Barow ardaydu ha soo sawiraan khariirad ay ku muujinayaan:
   - Dhul miyi ah oo kuyaala meel jog sare leh
   - Dhul magaalo ah oo joogiisu sareeyo
   - Miyi meel joog hoose leh kuyaala
   - Magaalo dhul joog sare leh ku taala
3. Ku dhiirigali in ay cimilada goobahaas sare iyo Hab-nololeedkooda kala aqoonsadaan.

# Jawaabaha Layliga Guud ee Cutubka 1aad

**I. Run ama Been**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. Been | 6. Run | 11. Run | 16. Run |
| 2. Been | 7. Been | 12. Run | 17. Run |
| 3. Run | 8. Run | 13. Been | 18. Been |
| 4. Run | 9. Run | 14. Been | 19. Been |
| 5. Run | 10. Run | 15. Run | 20. Been |

## II. Kadooro

1. B 2. J 3. B 4. X 5. J

## III. Kadooro

1. X 2. T 3. X 4. B 5. B

## IV. Buuxi meelaha banaan

1. Diinta Islaamka
   Diinta Kiristaanka
2. 7aad
3. U hogaansan Alle
4. 1aad C.D.

## V. Isku Aadi

1. B 2. J 3. T 4. X

## VI. Isku Aadi

1. KH

2. T

3. J

4. X

5. B

## VII. Qoraal gaaban

| **Dalalka Geeska Afrika** | **Dalalka aan aheyn** |
|---|---|
| • Itoobiya | • Suudaan |
| • Soomaaliya | • Masar |
| • Eritariya | • Tansaaniya |
| • Jabuuti | • Kiinya |
| | • Jaadh |
| | • Yugaandha |

| 2. **Wadamada aan Xeebta lahayn** | **Wadamada Xeebta leh** |
|---|---|
| • Itoobiya | • Soomaaliya |
| • Jaadh iyo | • Jabuuti |
| • Yugaandha | • Eritariya |
| | • Kiinya |
| | • Suudaan |
| | • Tansaaniya iyo |
| | • Masar |

3. Magaala madaxda

- Itoobiya = Addiis Ababa
- Soomaaliya = Muqdisho
- Eritariya = Casmara
- Suudaan = Khartuum
- Jabuuti = Jabuuti
- Kiinya = Nayroobi
- Masar = Qaahira
- Jaadh = Nijamena
- Tansaaniya = Daara Salaam
- Yugaandha = Kambaala

# CUTUBKA 2 DHULKA IYO WAXA KU XEERAN

## HORDHACA

Ardaydu waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan waxa ka dhaca dhulka iyo waxa ku xeeran. Qeybta ugu horaysa ee ogaanshaha dhulka iyo fahanka waxa ka dhaca waa ogaanshaha ama garashada meeli (meeluhu) halkay dhacaan. Khariiradaha ayaa ah kuwo qeyb libaax ka qaata fahanka bulshada, dhaqaalaha, kala duwanaanshaha qaab dhismeedka oogada sare ee dhulka aynu kunool nahay.

Waa maxay waxa ay meeli kaga duwantahay meelaha kale ee kuyaala oogada sare ee dhulka? Waxaa su'aashaan fahankeeda inaga caawin su'aalahan soo socda.

- Waa xagge goobi (meeli) halka ay dhacdo?
- Maxay yihiin dabeecadaha ay leedahay meeli?
- Sidee ayeey ula dhaqmaan dadku kheyraadka dabiiciqa ee ay meeli leedahay?
- Side bay dadka, alaabta (qalabyada ay dad ku isticmaalaan) iyo fikradahu ay u dhex socdaan meelaha (goobaha)?
- Side ayey meeli ugu egtahay (La nooctahay) ama u kala duwan yihiin meel kale?

Su'aalahaa aan soo sheegnay ayaa ah kuwo idinka caawinaya in aad si fiican wax uga fahantaan cutubka guud ahaantii. Shantaa su'aalood ayaa ah kuwo aad muhiim u ah Loona yaqaano shanta mawduuc ee juquraafiqa ugu muhiimsan.

### Qaar kamid ah Hababka ardada lagu bari karo caalamka (Aduunka)

- U sheeg oo tusi ardada in uu juquraafigu yahay meel kasta.
- Ka yeel juquraafiga mid lagu barto maadooyinka kale.
- Hel xidhiidhyada caalamiga ah
- Daahfur meeraha adigoo isticmaalaya taknoolajiyad.
- Xataa u dhig casharo mid manhajka waxbarashada ka baxsan.
- La xidhiidhi ardada dadka wadamada kale iyo dhaqamada kale.
- Ka caawi ardada in ay sawirtaan (qiyaasaan) mustaqbalka.

## Ujeedada Cutubka

***Marka uu dhamaado cutubku, ardadu waxay awoodi doonaan in ay;***

- *Aqoonsadaan halka uu wadankooda iyo deegaankoodu ay daris ahaan iyo xariiq ahaan dhacaan (kuyaalaan)*
- *Aqoonsadaan isticmaalka iyo akhriska khariiradaha.*
- *Sawiraan khariirad fudud oo tilmaamaysa (caddeynaysa) jahada iyo halka ay meeli dhacdo.*
- *Fahmaan qaabka iyo dhaqaaqa dhulka iyo sameynta uu dhaqaaqa dhulku leeyahay*
- *Sharrxaan xiliyada kala duwan ee Itoobiya.*
- *Sharxaan saameynta ay xiliyadu ku leeyihiin beeralayda iyo xoola dhaqatada.*

### Tusmooyinka muhiimka ah ee cutubka 2aad

(Guud ahaan xiisadaha cutubkan waa 10)

2.1 Meesha aan ku naalo (dhacno)

2.2 Qaabka dhulka, dhaqaaqa dhulka iyo saameyntiisa.

2.3 saameynta ay xiliyadu ku leeyihiin beera qodatada iyo xoola dhaqatada.

| Qeybaha cutubka | Ciwaanada cashirka | Ujeedada gaarka ah | Xiisadaha loo qoondeeyey | Bogaga buugaagta ardayda | Bogaga buuga baraha | tixraac |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 2.1 | Meesha aan ku naalo | • Sharax dalkeena Itoobiya halka uu daris ahaan iyo xariiq ahaan uu dhaco<br>• Aqoonsadaan xariiqyada loolasha iyo dhigaha.<br>• Akhrinta iyo isticmaalida khariirada<br>• Sawir khariirad gacmeed fudud oo natu sinaysa halka ay meeli dhacdo iyo jahada | 8 | | | |
| 2.2 | Qaabka dhulka dhaqaaqa iyo saameyntiisa<br><br>Maalinta iyo Habeenka | • Sharrax qaabka dhulka<br>• Sharax sida uu dhulku u dhaqaaqo<br>• Fahmaan saameynta uu dhulka dhaqaaqii su leeyahay<br><br>• Sharxaan sida uu dhul ka shaqaaqiisu u keeno isbadbadalka maalinka iyo habeenka.<br>• Sharxaan dheeraanta xiliga maalinta iyo habeenka ee loolasha kaladuwan | 8 | | | |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Isbadbadalka xiliyada | • Sheeg xiliyada ugu waa weyn ee loolasha hoose, kuwa dhexe iyo kuwa sare<br>• Sharax sida ay xiliyadu isu badbadalaan qeybaha kala duwan ee dhulka | | | | |
| 2.3 | Xiliyada Itoobiya | • Sheegaan xiliyada waawayn ee Itoobiya<br>• Sharxaan caalaamadaha iyo dabeecadaha xiliyada dalkeena Itoobiya.<br>• Fahmaan side ay beeraqodatada iyo xoola dhaqatadu uga kabtaan habnolaleed kooda | 2 | | | |
| 2.3.1 | Saameynta ay xiliyadu ku leeyihiin beerqod ashada iyo xoola dhaqatada. | • Sharax nooca dhaqaale ee lagaga tiir sanyahay dhulalka jooga hoose leh iyo kuwa jooga sare leh ee dalkeena.<br>• Sharxaan sida ay xiliyadu u saameeyaan beeralayda iyo xoola dhaqatada Itoobiya. | | | | |

# 2.1 Meeshaan Ku Naalo (Dhacno)

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirka, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:-***

- *Sharaxaan halka uu waddan dhaco (ku yaalo) daris ahaan iyo xariiqyaha loolasha iyo dhigaha.*
- *Isticmaalaan akhriyaana khariirada*
- *Gacantooda ku sawiraan khariirad fudud oo jahada iyo halka ay meeli dhacdo na tusaysa.*

## 2. Tusmooyinka

- Halka ay meeli dhacdo
- Khariirad
- Isticmaalka khariiradaha na tusinaya jahada iyo halka ay meeli dhacdo.

## 3. Araar

Khariiradu waa muuqaal u taagan oogada (qolafka) sare ee dhulka ama qeyb kamid ah.

Khariiradaha muuqaaleed waxay si qota dheer noo tusiyaan qaabsameyska dhuleed ee ay goobi (meeli) Leedahay.

Juquraafiyaqaanadu marka ay goob daraasaad ku sameynayaan waxay inta badan ka bilaabaan in ay hllaan halk ay goobtaasi (meeshaasi) dhacdo. Goobi ama meeli halka ay dhacdo waxaa lagu heli karaa labada wado ee kala ah xariiqahaan iyoo daris ahaan.

Xariiqahaan: halkay meeli dhacdaa (kutaalaa)? Waxaynu kaga jawaabi karnaa su'aasha inagoo sheegna halka ay goobtu ka dhacdo xariiq ahaan aqalduunka (Galoobka).

Xariiqahan oo ah kuwo mala awaal (qiyaaseed) ah oo mara dhulka dushiisa ayaa inage caawiya in aynu helno meeli halka ay kaga taalo adhuunka ama aqal-aduunka (Galoobka) dhulbadhaha ayaa kamid ah xariiqyadan.

Dhul badhuhu wuxuu aduunka u qeybiyaa Laba waaxood ama nusdhuleed. Dhamaan biyaha iyo dhulka u dhexeeya dhulbadhaha iyo cidhifka waqooyi waxaa la dhahaa nusdhuleedka Waqooyi. Sidookale, inta udhaxaysa dhulbadhaha iyo cidhifka koonfureed waxaa la dhahaa nusdhuleedka koofureed. Xariiqyaha garab qaada dhul badhaha waxaa looyaqaanaa xariiqaha loolasha (Lool) xariiqyada isku xidha Labada cidhiifna waa Layidhaahdaa dhigo.

Meeli daris ahaan halka ay dhacdo: waxay ka dhigantahay marka aynu rabno in aan helno meel halka ay dhacdo inagoo la xidhiidhinayna dariskeeda (wadamada ama meelaha kale ee ay dariska yihiin biyo iyo barri midkay doontaba ha noqotee). Cashirkan waxaad xooga saari isticmaalka khariiradaha iyo sawir gacmeedyada fudud.

Barraw iskuday in aad ugu yaraan haysatid hal aqal aduun (glob) khariirada aduunka oo ay ardadu fiirsato. Baraw waydii ardada in ay halaan Loolka iyo dhigta meesha aykun ool yihiin.

Khariiradi waa cabbi qiyaaseed kumuujin utaaqan wax dhabah (dhul). Baraw ardada fahansii waxa ay tahay khariirad, iyo faa'iidooyinkeeda. Khariirad muuqaal eedyadu waxaa ay kaga duwanyihiin kuwa kale tilmaamida (muujinta) saraynta dhulca iyadoo isticmaalaysa xariiq aha marsiimada siman (kontoors).

# 4 Habka baris barasho

## 4.1 Adeegsiga Kaabayaasha Barista

- Khariirada caalamka
- Aqal aduun (gloob)
- Buugaagta khariiradaha ay kuyaalaan (Atlaas)
- Khariirad muuqaaleedka Aduunka
- Khariirada jidka Diyaarada ee Itoobia ayrlaan.

## 4.2 Adeegsiga hababka wax dhigista

- Muuqaalo kumuujin (Tusid)
- Kawadahadlid (doodid)
- Su'aalo iyo ja'oo eebo
- Sharaxaad.

## 4.2 Diyaar garawge cashir diyaarinta horteed.

- Baraw isku day in aad heshid khariirada aduunka.
- Baraw iskuday in aad heshid sawir (muuqaal) ay ku yaalaan dalxiisayaal isticmaalaya khariirada wadooyinka Addis Ababa.
- U dir hawl (shaqo) ardada ku saabsan sida khariiradda looga meeli halka ay dhacdo sida loo ogaan karo
- Baraw ha lama Laba arday ha ku sawiraan khariirada Itoobia Sabuurada.
- Ku boori ardada in ay soo indha indheeyaan (akhristaan) khariirada caalamka.

## 4.3 Soo bandhigida Cashirka.

**B. Hordhaca Cashirka**

Baraw marka aad ardada u sheegto cashirka ay barandoonaan waxa uu ku saabsanyahay kadib ku bilow cashirka su’aalahan soosocda.

- Waaxdee (qeybtee) ama nusbadhkee ayeynu dunida kaga nool nahay?
- Qaaradee ayey kula tahay in ay oogu dhawdahay cirifka koonfureed?
- Baddee ayaa u xigta (oogu dhaw) cirifkawaqooyin?
- Makulatahay wadan ama qaaradi halka ay darisahaan dhacdo in ay ku leedahay saameyn?
- Sidee ayeynu khariirada uga barankarnaa qaaradaha iyo baddaha waaweyn?

**T. Nuxurka cashirka.**

Baraw cashirka waxaad ardada kaga caawin in ay wadankooda halka uu dhaco aqoonsadaan iyo waliba qaaradooda iyo magaalada ay ku nool yihiin halka ay khariirada kaga taalo. Ardadu waa in ay aqoonsadaan calaamadaha furaha, Fogaanta, xariiqaha marsiimada siman, jahada iyo waliba qiyaas cabbirka khariiradaha.

Baraw ardadaada ka caawi in ay gacmahooda ku sawiraan khariirad fudud oo ah mida magaa ladooda iyo Dugsigooda.

## 5. Qiimeynta iyo dabagalka ha socodka

**B. Qiimeynta**

- Baraw tus ardada sawirka khariirada wadooyinka Addis-ababa oo ay Isticmaalayaan dalxiisayaal, kadibna waydii in ay dalxiisayaashu si ayna uhabaabin isticmaalayaan wadooyinka halka ay kuyaalaan daris ahaan iyo in ayhalkay ku yaalaan xariiqa haan isticmaalayaan?
- Weydii baraw ardayda in ay kala aqoonsadaan (kala soocaan) xariiqaha Loolasha iyo kuwa dhigaha ee khariirada dusheeda.
- Ha sawiraan khariirada Dugsigooda iyo agagaarkiisa?

- Waydii in ay kala garana yaan midabada iyo calaamadaha khariirada ku yaala ee aalaa la isticmaalo.
- Waydii in ay cabbiraan fogaanta laba meelood oo khariirada dusheeda ah u dhaxaysa.

**T. Dabagalka (ukuur gelida) ha socodka**

Waa muhiim ardeyda in loo kuurgalo lana caawiyo marka ay sawirayaan khariiradaha, fahmaan akhrinta astaamaha iyo calaamadaha khariirada iyo cabbirida fogaanshaha.

## 2.2 Qaabka Dhulka, Dhaqaaqa Iyo Saameyntiisa

### 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirka, ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:-***

- *Qeexaan qaabka dhulka.*
- *Caddeeyaan sida uu dhulku u dhaqaaqo.*
- *Fahmaan saameynta uu dhulka dhaqaaqiisa uu leeyahay.*
- *Caddeeyaan dheeraanta maalcnka iyo habeenka ee loolasha kala duwan.*
- *Sheegaan sida uu dhulka dhaqaaqiisu u keeno (sababo) xiliyada.*
- *Taxaan xiliyada waaweyn ee Loolasha hoose, kuwa dhexe iyo kuwasare.*
- *Sheegaan sida ay xiliyadu isubadbadalaan meelaha kala duwan ee aduunka.*

### 2 Tusmada

- Maalinta iyo habeenka
- Xiliyada

### 3. Araar

Saynisyahanadu intooda badan waxay aaminsan yihiin caddada ilayska tamarta cadceeda ka soo baxa in uu yahay mid iskumid ah (Islaeg), balse ilayska cadceed ee uu dhulku helo waa uu kaladuwan yahay caddadiisu oo xataa halka lool ayaana helin ilays isku mud ah.

Dhulku waxuu sameeyaa Laba wareeg. Wareega uu qoraxda ku wareegayo iyo midka uu udub-dhexaadkiisa kuwareegayo. Dhulka marka uu qoraxda kuwareegayo wuxuu janjeedhsada $23^0$ ½ janjeedhsigaa ayaana sababa xiliyada iyo kala badnaanshaha saacadaha maalinka iyo habeenka. Wareega kale ee uu dhulku ku wareego udub-dhexaadkiisa 24 saac marka, ayaa sababa isbadbadalka maalinka iyo habeenka.

Baraw aalaa ardeydu waxay aaminsan tihiin wareega dhulka in uusan jirin oo ay qoraxdu wareegayso, marka aad uga dhaadhici oo fahansii. Kolba qeybta u janjeedhsata qoraxda ayaa waxay ku jirtaa xagaa, qeybta kalana waxay u tahay jiilaah.

Baruhu waa in uu hubsadaa ardadu in ay si fiican u fahmeen wareegmaalmeedka iyo wareeg sanadeedka dhulka. Waana in uu macalinku wato aqal-aduunka (gloob), uuna waydiiyo su'aalo ardeyda fahankooda khaladka ahaa kabadalaya. Midan waa mid aad muhiim u ah hadiikale waxaa sii adkaanaysa (xooga sanaysa) argatidii ardayda ee khaldaneyd.

## 4. Hababka barisbarasho

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

- Koonka (Glob)
- Khariirada aduunka (caalamka)
- Qoraxda iyo dhulka iyo xiliyada kala duwan

### 4.2 Adeegsiga hababka wax dhigista

- Tusid (muuqaal ku muujin)
- Wadahadal (munaaqasho)
- Shaqo kooxeed iyo soo jeedin (qoritaan 2 bog ah oo koox lagu qoro oo ku saabsan saameynta dhaqaaqa dhulka).

### 4.3 Diyaargaraw cashir diyaarinta kahor.

- Shaqo qoraal ah oo ku saabsan dhaqaaqa dhulka iyo saamayntiisa u dir ardeyda.
- Baraw isku day in aad heshid koonka (glob) iyo khariirada caalamka.

- Diyaari koox ardey ah ama marti kale ah oo aqoon fiican u leh meeraha dhulka.
- U dir koox ardeyda kami ah in ay soo sawiraan wareega dhulku uu qoraxda ku wareego iyo xiliyadiisa

## 4.4 Soo bandhigida (soo jeedinta) cashirka)

**B. Hordhaca Cashirka**

- Markaad baraw ardada u sheegto cashirkooda manta, ku bilow su'aa lahan soosocda.
- Qaabka dhulku sidee ayuu u egyahay?
- Keebaa dhaqaaqa ma qoraxda mise dhulka?
- Wakhti intee dhan ayey dhulka ku qaadataa halkiisa wareeg ee uu qoraxda kusoowareego.

**T. Nuxurka Cashrka**

Baraw markan ardeydu waa in ay fahmaan dhaqaaqa dhulka iyo saameyntiisa. Wada hadalka adiga iyo ardayda ha ahaado mid ahmiyada siinaya Jawaabaha su'aalahan soo socda. Baraw tilmaamahaaga iyo soo bandhigaagaba ha aheadeen kuwa kaga Jawaabaya su'aalaha muuqaal (la'arko).

1. Maxaa sababa (keena) habeenka iyo maalinta?
2. Maxaa sababa xiliyada?
3. Maxay xiliyada nusbadhka koonfureed ay lidka uguyihiin xiliyada nusbadhka waqooyi?
4. Maxay maalintu uga dheertahay habeenka marka lagu jiro xiliga xagaaga.
5. Maxaa sababa in Lamoodo qoraxdu in ay socoto (dheqaaqeyso).

Sadaxda wax ee sababay inay jiraan xilliyadu.

1. Janjeedhsiga dhulka.
2. Wareega dhulka uu ku wareegayo qoraxda (Rifolushin).
3. Cidhifka Waqooyi oo ah mid aana iska badalih waligii Jihadiisa.

Side ayuu janjeedhsiga dhulka u saameeyaa isbadadalka xiliyada, iyo kaladuwanaansha xaglahu side ayey u saameeyaan xiliyada kaladuwan?

## Jawaab

Waxaa isbadbadalka xiliyada gundhilg u ah celceliska Heerkulka maalinka, taaso ah cadada tamarta Cadceedeed ee uu dhulku helo halka maalin taasina waxay kuxidhantahay kolba inta saacadood ee ay Qoraxdu sida tooska ah ama sida dadban ay oogu aadantahay qaybtaas. Marka uu dhulka dhinaca u janjeedhsado waxaa jiri maalmosanadka kamidah oo ay goobo kuyaala hal Lool ay sitoos ah ugu aadd antahay qoraxdu helina ilayska caddceeda ee oogu xooga badan (ugu sareeya), waxaana looyaqaanaa xiligaas xagaa. Waxaa iyana jiri maalmo aynan qoraxdu sitoos ah ugu aadaneen oo ay kadadbantahay meelaha qaar. Marka aynan qoraxdu sida tooska ah kuugu aadanayn ilayska caddceedu wuxuu noqon mid aad u yar oo aanan lahay kulayl badan, waxaynu u naqaanaa xiligaasna Jiilaal.

Marka, Isadbadalka xiliyadu waxay ku xidhanyihiin dhinac u janjeedhsiga udubdhexaadka dhulka, sababtoo ah wuxuu hogaamiyaa isbadalka kulayi ka uu helayo 1 ka $m^2$ ee oogada dhulka kamid ah iyo wlaiba kalabadnaanta saacadaha maalinka iyo habeenke.

## 5. Qiimaynta iyo U kuurgalka ha socodka

**B. Qiimaynta.**

Baraw waydii ardeyda.

1. Maxaa keena (sababa) maalinta iyo habeenku?
2. Maxaynu u helnaa xiliyada kala duwan?
3. Xili (wakhti) inteedhan ayey ku qaadataa wareega dhulka uu qoraxda kuweree gayo?
4. Sideeyuu dhulka janjeedhsigiisu usaameeya isbaadbadalka xiliyada?
5. Barow uqaybi ardada sadex kooxood kadibna hasoojediyaan warbixin kusaabsan xiliyada ee.

   i. agagaarka dhulbadhaha

ii. Loolasha dhexe

iii. Loolasha sare

**T. dabagal (ukuurgal)**

Barow iskuday in aad u kuur gashid ardada marka ay koox kooxda isula shaqay hayaan. (Doodayaan)

Marka ay koox kooxda. U wada shaqaynayaan, Doodayaan ayna ka wada hadlayaan saamaynta maalinka iyo habeen ka iyo xiliyada.

**Casharka 3aad**

# 2.3 Saameynta ay xilliyadu ku leeyihiin Beer falashada iyo xoola dhaqa shada

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhammaado cashirka ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:***

- *Taxaan ama sheegaan xiliyada waawaynee Itoobiya.*
- *Ama ay sharaxaan xiliyada kala duwan ee sanadka*
- *Sharaxaanna calaamadaha iyo dabeecadaha xiliyada itoobiya*
- *fahmaan sida ay beeralayda iyo xoola dhaqa qatadu u soo saartaan hab nolaleed kooda*
- *Qeexaan noocyada dhaqaale ee lagu tiirsan yahay. Dhulka jooga hoose iyo meelaha jooga sare ee dalka.*
- *Sharaxaan sida ay xiliyadu saamaynta ugu leeyihiin beeralayda iyo xoolo dhaqatada itoobiya.*

## 2. Tusmada xiliyada Itoobiya

Saamaynta ay xiliyadan kuleeyihiin beer qodoshada iyo xoolo dhaqashada

## 3. Araar

Barow waa inaad ardayda ka caa wisaa inay fahmaan xiliyada kala duwan ee Itoobiya, iyo xiliyada deegaan kooda. Waxaa iyaha muhiim ah in ay fahmaan ardaan sida uu isbadalka xiliga u saameeyo waxqab adkii. Sida deegaamada

Itoobiya oogada sare ee dhulkoodu u kala duwan yahay ayuu dhalku u lee yahay cimilo kala du wan.

Buuralayda dhexe ee dalka waxa ay leedahay cimilo dhex dhexaad h ataasoo ay isbadalka kala du wanaanshaha heerkulka xiliyada kala duwan uu aad u yar yahay (uhooseeyo). Cel eeliska heer kulka ugu hooseeyo ee xiliga qaboobaha.

Buuralayda dhexe Itoobiya waa $6^0{}_C$ halka marmar qudha uu dhaafo $26^0{}_C$.

Kala duwanaanshaha heerkulka xiliyada ee dhulalka jooga hoose waa mid aad u badan. Kulaylka meelaha Lama dagaanka ah iyo meelaha ku yaala xeebta badda cas waana mid xad ka baxa, oo marmarka qaarkood gaadha illaa iyo $60^0{}_C$.

Roobka oogu badan wuxuu dalka intiisa badan ka d'aa bilaha Juun, Julay iyo ogosto, deegaanka buuralayda ah ee badhtamaha dalka ku yaala ayaa hela. Roob ka badan mid ka ka da a waqoo yiga Itoobiya. Wuxuuna gaadhaa illaa iyo 122cm (48m) sanaadkii celceeliska roobka uu helo deegaankeena ayaa ah mid ka yar (ka hooseeya 10cm(4m).

Deegaan ka ugu roobka badan dalkeena itoobiya wuxuu helaa sanaadkii roob ku dhow 200cm (80m). Waxaa dalka saamaysay abaa raad u xun u dhaxaysay sannadihii 1982 – 84, 1987 – 88 iyo 1991.

Qodoshada beeraha ayaa ka mid ahaa waxyaabaha ilaha dhaqaale ee ugu muhiim san dalkeena itoobiya. Waxayna nola sheenu ku tiirsan Tahay beeraha ku dhawaad 85% oo dadka itoobiya ku nool, itoobiya ayaa ah midda oogu horaysa afrika dhinaca xoolo dhaqatada waxayna leedahay xoolo madaxoodu gaadhayo 75, Milyan. Dadka xoolo dhaqatada itoobiya waa kuwo xilyo kala duwan guur guura si ay. Baad iyo biyo ugu helaan xoolahooda. Itoobiya waxay dhoofisaa wax soo saarka beeraha, marka ay la daristo cimilo xun beerahaas waxsoosaarkoodii cunno iyo Dakhliba wuu is dhimaa,

Tusaale ahaan haragga iyo maqaarka ayaa kaalinta labaad ee wax dhoo finta Itoobiya ku jira iyadoo waliba dalku sidii loo baah naa uu san uga. Faaiidaysanin.

Ayaa hadana waxaa aadu saamaysay abaaro ba an oo soo noqo noq da iyo xanuuno ku dhaca xoolaha beeralayda iyo xool o raa catada itoobiya. Waxaa soo waajahaya cunno. yaraan ay u muuqato calaamadaha macaluusha hordha ca. u ah sida tirade dadka oo aad u korodhay, xoolaha oo aadu haajira,

caafimaadka xoolaha oo ka sii daraya iyo iyadoo meelo dalka ka mid ah laga soo tabiyay in ay ka jiraan xanuunada dhimashada xoolaha sababa.

## 4. Hababka baris barasho

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha wax-barista

- Khariiradda itoobiya
- Qoraxda iyo dhulka oo xiliyada kala duwan ku sugan.

### 4.2 Adeegsiga hababka wax-barista

- Muuqaal ku tusid
- Wada hadal
- Shaqo kooxeed iyo soo jeedin kooxo qorta laba bog oo xiliyada itoobiya iyo saamaynta ay ku leeyihiin beeralayda iyo xoolo dhaqatada ku saabsan sharaxaad.

### 4.3 Diyaar garowga cashir diyaarinta ka hor

- Barow u dir ardada in ay soo akhriyaan xiliyada Itoobiya macluumaad ku saabsan
- Barow isku day in aad heshid khariiradda Itoobiya
- Barrow u dir koox yar oo ardada ka mida in ay soo akhriyaan ka dibna soo jeediyaan Hab nolo leedka beeralayda iyo xoolo dhaqatada Itoobiya.

Tusaale nolasha deegaan ka Canfarta iyo ka Soomaalida iyo beeralayda waqooyiga Itoobiya midda ka jirta.

### 4.4 Soo jeedinta cashirka

**B. Hordhaca cashirka**

Baraw marka aad ardada u sheegto cashirkooda maanta, ku hilow su’aalahan soo socda.

- Xiliyada keed ugu jeceshahay?
- Waa maxay xiligu?
- Sheeg (tax) xiliyada waawayn ee Itoobiya

**T. Nuxurka (guda galka) cashirka**

waxaa loo baahan yahay inaad fahansiiso xiliyada waa waynee Itoobiya u qaybi ardayda koox koox tiro yar oo sheegaan kana doodaan calaamadaha iyo dabee cadaha xiliyada kala duwan ee Itoobiya waxaa kaloo muhiim ah ardayd in ay aqoonsadaa waxsoo saarka ay ka helaan dhaqaalaha ay ku nool yihiin amma ku tiirsanyihiin, iyaga iyo dhammaan deegaan ka soo maalida, waa in aad ardayda u sheegto amma sharaxdo cimilada iyo dhulka qayba hooda fiican beeraha, xoolaha, kaluumay siga. i.w.m. Barow diyaari labo koo xood wada hadal ku saab san qodobadan hoosk u qoran ku tartama.

- Maxay ku nool yihiin beeralayda iyo xoola dhaqatadu?
- Ma idin la tahay in ay xiliyadu saamayn kulee yihiin beero qodatada iyo xoolo dhaqatada,.

Isbadalka cimilada ayaa sificliyan ah u waxyee laynaya wadamada qaaradda Afrika. Barrow ka caawi ardadaada sida cimilada iyo xiliyadu saa maynta ugu leeyihiin waxsoosaarka cunnada, wax yaa baha la dhoo fiyo dakhliga, wax kayd siga iyo xa nuunada malaari yada oo kale ah.

## 5. Qiimaaynta iyo Dabagalka ha socoda

**B. Qiimaynta**

- Tax xiliyada ugu mu him sanee itoobiya
- Maxay yihiin dabee cadda xiliga, xagaaga (kiramti)
- Waa maxay faraqa u dhe xeeya beero qoda tada  xoolo dhaqatada
- Sharaxa sida ay xiliyadu saamaynta ugu lee yihiin beero qodashadooda xoolo dhaqasha dooda.

**T. dabagalka hasocodka**

Baraw ardada dhiir igali oo dabagal ku samee in ay isticmaalaan khariiradaha si ay sifiican ugu fahmaan xiliyada Itoobia. Waxaa iyana muhiim ah in aad khabiiro dhanka cimilada ee hawada takhasus u leh aad ku macsuunto fasalka.

# Jaabaha Layliga Guud ee

**I. "Run" ama "Been" uga jawaab**

1. Been
2. Run
3. Run
4. Run
5. Run

**II. Buuxi meelaha Banaan**

1. Isbadalka maalika iyo habeenka iyo isbadalka xilliyada
2. Waqooyi
3. Kulaalaha kansar
4. Kulaalaha kaabrikoon
5. Juun, Julaay iyo Agoosto

# Cutubka 3 Deegaankeena

## Tusmooyinka Cutubka

3.1 Noocyada waaweyn iyo kuwa waxtarka leh ee dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah ee itoobiya iyo Geeska Afrika.

3.2 Waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanka duurjoota ah.

3.3 Saameynta ay dhokhsa u korarka tirada dadka ku leedahay dhirta dabirciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.

3.4 Dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.

## 3.1 Noocyada waa weyn iyo kuwa waxtarka leh ee dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah

**Tirada xiisadaha - 4**

### 1. Ujeedada gaarka ah

***Markuu dhamaado cashirkan, ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:-***

- *Qeexaan dhirta dabiiciga ah waxay tahay?*
- *Aqoonsadaan aagaga laga helo noocyada muhiimka ah ee dhirta dabiiciga ah ee geeska Afrika.*
- *Kala soocaan dabeecadaha muuqaaleed ee ay dhirta dabiiciga ah ee aag ku taala ee ay gaarka u leedahay.*
- *Aqoonsadaan xayawaanada duurjoogta ugu waawayn ee geeska afrika.*

### 2. Tusmada cashirka.

- Noocyada waa weyn ee dhirta dabiiciga ah.
- Noocyada waa weyn ee xayawaanada duur jooga ah.

## 3. Araar

- Dhulka geeska afrika waa dhul uu qaab dhismeedka oogadiisa sare ay kala duwan tahay. Meelaha jooga sare leh ee geeska afrika waxay kamid yihiin meelaha ay sarayntoodu ugu dheer tahay ee qaarada.

Dhulka jooga sare ee Itoobiya iyo deegaamada kale ee geeska afrika ayaa ah mid leh cimilo kala duwan. kaladuwanaansha han cimilada ayaa sababay kala duwanaanshaha dhirta dabiiciga ee geeska.

Noocyada dhirta itoobia iyo geeska afrika waxaa kamid ah dhirta lama dagaanka iyo lama dagaan xigeenka, dhul cawseedka, keymaha, iyo dhirta Albayn dhirtan ayaa waxay hooy utahay noocya badan oo xayawaan duurjooga ah:

## 4. Hababka baris barasho

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha wax-barista.

- khariirado, kuwa cimilada iyo kuwa dhirta dabiiciga ah ee Itoobiya iyo geeska Afrika.
- Sawiro, filimo.

### 4.2 Adeegsiga hababka wax-barista.

- Su'aalo
- Tusid (muuqaal ku muujin)
- Sharaxaad
- Wada hadal (laba laba koox yar, dhamaan Fasalka oo dhan)
- Booqasho cilmiyeed (dalxiisid goobo u)

### 4.3 Diyaar garawga cashirka ka hor

Barow diyaargarayso khariiradaha, sawirada iyo filimada intaadan galin fasalka aad cashirkan u dhigayso. Hadii aad qalabkan ka waydo dugsiga, adigu waa in aad samaysataa qaar kamid ah adigoo adeegsanaya qalabka aad kaheli karto aagaaga.

Baraw samee diyaargaraw cashirka hortii soona akhri buuga ardeyda iyo buugaagta kale ee la xidhiidha cashirkan.

## 4.4 Soo bandhigida Cashirka

### B. Hordhaca cashirka

Baraw intaadan u gudagalin cashirka, waydii su'aalo si aad u ogaato waxa ay kagaranayaan dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah ee Itoobia iyo Geeska afrika kuna bilow su'aalahan soo socda.

- Waa maxay duurjoog?
- Maxay tahay dhirta dabiiciga ahi?
- Maxay yihiin nooca dhirta dabiiciga ah ee ka baxa aaga aad dagantihiin.
- Ma garanaysaan qaar kamid ah xayawaanada duurjoogta ee Itoobiya?

### T. Nuxurka cashirka

- Baraw dhagayso jawaabaha ardada ay kaga jawaabeen su'aalaha kor ku qoran; kadib u kala caddee ardada in ay jawaaba hoodu sax yihiin iyo in kale.
- U sharax xaqiiqada ah in dhulka sareyntiisu ay saameyn ku leedahay xaalada cimilo ee Itoobia iyo geeska afrika iyo noocyada dhirta dabiiciga iyo duurjoogta Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Ka wadahadla noocyada waa weyn ee dhirta ka baxda degaamada cimilada kala duwan ee Itoobia iyo geeska Afrika.
- Adigoo adeegsanaya khariirada geeska afrika tus ardeyda meelaha ay ka baxaan noocyada waaweyn ee dhirta dabiiciga ah ee Itoobiya iyo geeska Afrika.
- Baraw ardeyda intaad u qeybisid koox-koox tira yar waydii noocyada waaweyn ee xayawaanada duurjoogta ee laga helo aagaga dhirta dabiiciga ee kala duwan leh.

## 4.5 Qiimeynta iyo dabagalka ha socodka

**B. Qiimeynta**

Baraw si aad u ogaato heerka fahanka ardada ay fahmeen cashirka, waydii su'aalahan soosooda

- Waa maxay dhirta dabiiciga ah?
- Maxay yihiin xayawaanada duurjooga ah?
- Maxay yihiin noocyada dhirta ugu badan Itoobiya iyo Geeska Afrika.
- Dhir noocma ah ayaa ka baxda dhulka jooga hoose ee Itoobiya.
- Sheega qaar ka mid ah xayawaanada duurjoogta ah ee ku nool dhul cawseedka Itoobiya.

**T. Dabagalka (la socodka)**

Baraw si ay ardadaadu waxyaaba badan ama dheeraad ah uga ogaadaan deegaankooda u qeybi koox koox kadibna ha ka soo qoraan war bixino arimahan soo socda.
Noocyada dhirta dabiiciga ah ee kabaxa deegaanka soomaalida Itoobiya.
Xayawaanada duurjoogta ah ee degaanka soomaalida ku nool.
Xidhiidhka ka dhexeeya dhirta dabiiciga'ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.
**Cashirka Labaad:**

# 3.2 Waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duur jooga ah

**Tiraada xiisadaha 4**

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu cashirkan dhamaado, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:-***

- *Taxaan waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duur joogtada kheyraadkooda ee Itoobiya iyo geeska Afrika.*

## 2. Araar

Dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah siyaabo badan ayey muhiim u yihiin. Waxay ilaaliyaan dheelitirnaanta waxyaaba badan oo dabiici ah. Waxaa intaa dheer, waxaynu u isticmaalaa cuno ahaan, alaab caydhiin ahaan oo ay warshaduhu isticmaalaan, dawo dhaqameed, tamar, qalab dhismeed dekhli iyo waxyaaba kale. Dad badan oo ku nool Itoobiya iyo geeska Afrika ayaa ku tiirsan dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ee deegaamadooda. Waxay u isticmaalaan cuno dawo dhaqameed, da bay wax ku karsadaan, qalab dhismeed, alaab caydhiin (warshadaha) iwm.

## 3. Habka Baris Barasho

### 3.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

- Sawiro, boosta kaardiyo
- Filimaan
- Farshaxano (sawiro gacanta lagu sawiray)

### 3.2 Adeegsiga hababka wax barista.

- Sharaxaad
- Muuqaal ku tusid
- Ka wada hadlid
- Daraasaad sameyn.

### 3.3 Diyaar garawga cashirka Kahor

Baraw ha kuu ahaadaan kaabayaashu diyaar,

Hadii aad dugsiga ka weydo qalabkaas waa in aad adigu qaar kamid ah sameysatid si ay ardeydu muuqaalo (sawiro) kaba u helaan.

Baraw cashir ku saabsan qeybtan soo diyaarso. Adigoo kaashanaya buuga ardayda iyo kuwa kale ee laxidhiidha cashirkan ku saabsan waxtarada dhirta dabiiciga ah iyo xaya waanada duurjooga ah ay u leeyihiin deegaanka iyo dadka.

## 3.4 Soo Bandhigida Cashirka/Soo Jeedinta Cashir

**B. Hordhaca cashirka.**

Marka bilaabayso cashirkan baraw waa in aa marka hore ogaato ardadu inta ay ka yaqaanaan (kagaranayaan) cashirkan marka, Baraw ku bilow su'aalahan.

Maxay muhiim u yihiin dhirta dabiiciga ah iyo xaya waanada duurjooga ah?

Sidee ayey dadku u isticmaalaan dhirta dabiiciga ah iyo duur joogta?

Miyay dadka aagiina kunool u isticmaalaan dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah waxyaaba kala duwan.

Maxay yihiin waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duujooga ah.

**T. Nuxurka Cashirka.**

Barow dhagayso jawaabaha ardayda ay su'aalaha kor ku qoran kaga jawaabaan kadib u sheeg jawaabaha saxda ah oo ka dhaadhici.

Iyagoo kooxa-yar aad u qeybisay ha ka wada hadlaan waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanda duurjoogta ay u leeyihiin deegaankooda, Itoobiya iyo geeska Afrika.

Kadib, ardaydu ha soo jeediso argatidooda ku aaddan waxtarkaas, kadib adigu u raaci sharaxaad inta ay iyagu garteen si ay kalsoonidoodu u siyaado una helaan aqoon ku filan oo ah iyo xay awaanada duur joogta ah ay u leeyihiin deegaankooda, Itoobia iyo geeska Afrikaba.

## 3.5 Qiimeynta Iyo Dabagalka ha socodka

**B. Qiimeynta.**

Baraw si aad u hubiso ujeedadii cashirka in lagu guulaystay, waydii su'aalahan soo socda

- Maxay muhiimka u noqdeen dhirta dabii ciga ah iyo xayawaanada duurjoogah?
- Sidee ayey u isticmaalaan dadku kheyraadka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah?

- Ma sheegi kartaan qaar ka mid ah waxtarka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah ay inoo leeyihiin?
- Dhirta noocee ah ayaa dawo ahaan looga isticmaalaa dagaankiina iyo guud ahaan deegaanka soomaalida Itoobiya?

**T. Dabagalka ha socodka.**

Si ay ardeydu aad wax ooga fahanto cashirka, u dir haw lama shaqo ku saabsan qodobadan soosocda.

Si caynkee ah ayey dadku u isticmaalaan kheyraadka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah ee agagaarkooda.

Maxay dadka aagooda kunool u ugaadhadaan xayawaanada duurjoogta?

**Cashirka sadexaad:**

# 3.3 Saameynta ay dhakhsa u koradhka tirada dadka ku leedahay dhirta dabiiciga ah iyo xaywaanada duurjooga ah

**Tiraada xiisadaha:4**

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka uu dhamaado cashirkan, ardadu waxay a woodi doonaan in ay.***

- *Aqoonsadaan saameynta dhakhsa u korarka tirade daka ay ku leedahay dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah ee geeska Afrika.*

## 2. Muuqaalka guud

Dhakhsa u korarka tirade dadka waxay kamid tahay waxyaabaha ugu daran ee dhibaateeya (wayeeleeya) deegaanka (bey'ad). Sida la ogsoonyahay guud ahaan tirade dadka ee aduunka, gaarahaana tirade dadka ee wadamada soo koraya ayaa ah mid si aad ah u kordhaysa.

Itoobiya iyo wadamada kale ee katirsan geeska Afrika oo ah kuwo kamid ah wadamada sookoraya ayey tirade dadku si aad ah u koradhaa. Hadaba dhakhsa u korarkan tirade dadka ayaa ah mid ku keenaya waxyeelo deegaanka. Marka

ay tirade dadka ay koradho, waxaa iyana kordhaysa baahida kheyraadeed oo ay kamid tahay mida dhulka ay uqabaan dadku. Si ay baahidooda u daboolaan ayey dadku u waxyeeleeyaan kheyraadka deegaanka. Waxay guraan dhirta iyo geedaha, daaqsadaan xoolahooda dhulcawseed ka kadhistaan wadooyin iyo guryo, waxyeeleeyaan duurjoogta iyo waxayaaba kale oo badan ayaa kamid ah saameynta dhakhsa u korarka tirade dadka uu ku keeno.

Waxyeelooyinkaas ayaa ku keena deegaanka hoos u dhac iyo sii xumaansho dhinaca tayada ah.

# 3. Hababka Baris Barasho

## 3.1 Adeegsiga kaabayaasha wax-barista

- jaantusyo, sawiro (boostaro)
- sawir (footo), filimo

## 3.2 Adeegsiga hababka wax-dhigista

- Su’aalo
- Muuqaal kumuujin
- Sharaxaad
- Kawadahadlid (doodid) (labalaba, kooxyar, huudahaan fasalka oo dhan).

## 3.3 Diyaargarawga cashirka kahor

Baraw diyaarso kaabayaasha wax-barista ee aad isticmaali doonta inta aadan, fasalka galin. Hadaad ka weydo dugsiga, waa in aad adigu qaar kamid ah kaabayaasha samaysatid.

Baraw cashirkaagu diyaar ha kuu ahaado adigoo kasooqoraya buuga ardada iyo buugaagkale oo laxidhiidha cashirka.

## 3.4 Soo jeedinta cashirka

### B. Hordhaca cashirka

Baraw inta aadan ugudagalin cashirka waydii ardada su’aalahan soosocda si aad u ogaato waxa ay kagaranayaan cashirkan kusaabsan dhakhsa u korka tirada dadka saameynta ay ku leedahay kheyraadka dhirta iyo duurjoogta.

Waa maxay dhakhso ukorka tirada dad ka?

Maxay koradhka tirada dadka ay xawliga ugu siyaadeysaa dalkeena Itoobia iyo geeska Afrika?

Dhakhsa u koraka tirada dadka faa'iido miyaa mise waa waxyeelo? Sababa?

Saameyn intee la'eg ayuu dhakhsa ukorarka tirade dadka ku hayaa deegaanka?

**T. Nuxurka Cashirka**

Baraw dhagayso jawaaba ha ardadu ay ka bixiyaan su'aalaha aan soo sheegn ay, ka dib ku qor jawaabahooda qaarka muhiimka ah sabuurada. Markaa kadib u kala caddie wixii sax ah iyo taan sax aheyn oo usheeq sida saxda ah.

Usharax saameynta ay dhakhsa ukorarka tirade dadka ku leedahay deeqaanka iyo sida ay korarkaa dadku uu cadaadis ka ugu abuuro deegaankqa. Sida ay dadku isugu balaadhiyaan una faragashadaan deegaanka si ay baahidooda udaboolaan.

## 3.5 Qiimeynta iyo dabagalka (u khuurgal) ha socodka

**B. Qiimeynta.**

Baraw si aad uhubiso in lahantay yoolkii cashirka, waydii su'aalahan soosocda:

- Waa maxay dhakhsa u korarka firada dadku?
- Maxa yihiin waxyaaba dhakhsa ukorarka tirade dadka ay ku keeneen Itoobia yo geeska afrika?
- Wa maxay saameynta ay ku reebto dhaksa ukorarka tirade dadku deegaanka?
- Maxay dadku u waxyeeleeyaan deegaankooda?

**T. Dabagalka (u khurgalid) lasocodka**

- Baraw si ay ardeydaadu ay aad wax oo gasiifahanto deegaan kooda, udir shoqo-kooxeed ku saabsan arimahan soo socda:
- Waa intee inteedhanyahay) korarka tirade dadka ee dwlad deegaanka soomaalida.
- Saameynta ay ku hayso koradhka dadku deenkeena soo malide. Ee itoobia.

- Talaabooyinka ay dawlada deegaankeena soomaalida ay qaaday si loo yareeyo waxyeelooyinka dadku ugaysto deegaan ke.

**Cashirka Afraad:**

# 3.4 Dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah

**Tirade xiisadaha = 7**

## 1. Ujeedada gaarka ah ee cashirka

Marka uu dhamaado cashirkan, ardadu waxay awoodi doonaan in ay:

- Qeexaan waxa laga wado dhawrida
- Aqoonsadaan talaabooyinka suurtaga lka ah ee lagu dhawrikaro dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanade duurjooga ah.

## 2. Araar

Hadii ladoonayo jiritaanka dhirta dabiic iga ah iyo xayawaanada duurjooga ah kheyraadkoodu in uu noqdo mid dadka iyo dagaankaba manaa facaad waara u haadaan waa in aynu dhawlo dhirta dabiiciga an iyo xayawaanada duurjooga ahba.

Waxaa jira habab badan oo loo dhawrikaro waxaana kamid ah in lasameeyo beero lagu ilaaliyo duurjoogta waxaa kaloo kamidah wacyigalinta bulshada iyadoo labarayo faa'iidooyinka aydhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah in oo leeyihiin intaa waxaa sii dheer, goynta dhirta oo laxakameeyo iyo ugaadhsiga sharcifarada ah oo isana laga ilaaliyo bulshada. Waxaa hadaba lagu kobcinkaraa lagun a badinkaraa dhirta iyadoo mar walba abuurida dhirta lagu dadaalo.

## 3. Hababka Baris – Barasho

### 3.1 Adeegsiga kaabayasha barista

Qoraalo iyo muuqaalo tusinaya ardada goobaha dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanadaduurjoogta ah lagu xanaaneeyo.

Sawiro iyo filimaan

Khariirada goobaha lagu dhawro (xanaaneeyo) xayawaanada duurjooga ee itoobia.

## 3.2 Adeegsiga hababka wax dhigista

- Su'aalo
- Muuqaal kumuujin (tusid)
- Sharaxaad
- Wada hadal lood (laba laba, koox-koox, guud ahaan fasalka oo dhan).
- Goobo booqasho.

## 3.3 Diyaargarawga cashirka kahor

- Baraw kaabayaasha wax-baristu hakuu ahaadaan diyaar inta aadan fasalka galin
- Soo diyaarso cashirkusaabsan qaybtan adigoo ka soo qoraya buuga ardada iyo buugaagta kale ee laxidhiidha cashirkan an dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.

## 3.4 Soojeedinta cashirka

### B. Horshaca cashirka.

Baraw  inta aadan bilaabin ee aadan ugud agalin cashirka, ku tijaabi su'aalahan ardada si aad u agaato waxa ay kayaqaanaan cashirkan.

- Maxaa loola jeedaa dhawrida?
- Maxaynu oogu baahanahay dhawrida deegaanka (ilaalinta deegaanka) aynu kunool nahay?
- Maxay yihiin qaababka kala duwan ee loo ilaalinkaro (dhawrikaro) biyaha iyo carrada?

### T. Nuxurka cashirka

Baraw dhagayso jawaabaha ardeydu ay ka bixiyaan su'aalaha sare oo qodobadooda kuqor sabuurada. Kadibna u kala sheeg jawaabahoodu in ay saxyihiin iyo inkale.

Usharax in ay dhawridu tahay si wacan ama wanaagsan u isticmaalka kheyraadka si uuu san u dabargu'in oo loo manaafa caado muddo dheer.

U faah faahi hababka kale duwan ee loo dhawrikaroo (xanaaneyn karo) dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoo ga ah.

## 3.5 Qiimeyn iyo dabagalka (ukuurgal) ha socodka

### B. Qiimeynta

Baraw si aad u ogaato in lahantay ujeed adii cashirka, weydii su aalehan soosocde:

- Maxaynu oogu baahanahay dhawrida dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah?
- Maxay yihiin hababka loo dhawrikaro dhirta dabiiciga ah iyo xayyaw aanada duurjoogta?
- Maxay yihiin beeraha lagu ilaaliyo laguna xanaaneeyo duurjoogta?
- Waa maxay dhirayn?

### T. Dabagalka ha socodka

Si ay ardadaadu waxyaaba badan ooga ogaato deegaankooda iyo dagaankoodaba, u dir shaqo kooxeed ku saabsan arimahan soosocda.

Maxay yihii dhibaatoyinka dhirta dabiiciga iyoxayawaanada duurjoogta lagu hayo ee kajira deegaanka soomaalida ee Itoobia?

Side ayey u dhawraan dadka kunool aagiina dhirta dabiiciga ah iyo xayawaan ada duurjooga ah?

Maxay yhiin magacyada goobaha lagu ilaaliyo duurjoogta ee Itoobia?

# Layliga Guud ee Cutubka 3aad

## I. Run ama Been ku qor

1. Run
2. Run
3. Been
4. Run
5. Run

## II. Buuxi meelaha banana

1. Dhir xaalufinta
2. Dhawrida ama ilaalinta
3. Hoose
4. Sare
5. Seera

III.

1. B. Waxaan ka helaa Birootiin
   T. Waxaa l'sticmaala warshadaha qaarkood
   J. Waaxaan ka helaa dhaqaale
   X. Qiimaha bilicda
2. B. Ila – tamareed
   T. Sabada duur-joogta
   J. Ilo cunno iyo dawo
   x. Dalxiiska

# Cutubka 4 Arrimaha Dadweynah

## Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

***Marka uu dhamaado cutubkan ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Sharxaan caado dhaqameedyada halista ah ee u horseedi kara (ugudbinkara) dadka HIV/AIDS-ka iyo saamayntooda ee Itoobiya.*
- *Lafa guraan raadka uu reebo ama saamaynta uu leeyahay dhakhsa u korarka dadka*
- *Qeexaan dabeecadaha maamulka suuban iyo xuquuqda caruurta.*
- *Kadoodaan saamaynta uu kul eeyahay HIV/AIDS-ku bulshada iyo dhaqaalaha wadamada Afrika ee saxaraha kahooseeya*
- *Aqoonsadaan lana xidhiidhiyaan shilka hababkooda badbaado.*

**Tusmooyinka muhiimka ah**

## 4.1 Arrimaha Dadwaynaha

Tusmooyinka Cashirka

- HIV/AIDS ka iyo caadooyinka halista ah
- Gudbinta HIV/AIDS- ka ee ay gudbiyaan caadooyin ka halista ah.
- Saameynta HIV/AIDS-ka

## 4.2 Saameynta Dhakhsa U Korarka tirada Dadka

- Yaraansha /kufilaan La'aanta adeega bulshada
- Yaraanshaha dhul beereedka

## 4.3 Maamulka Suuban, Xuquuqda Caruurta, Shilalka Iyo Badbaadadooda

- Maa mulka – Suuban
- Xuquuqda caruurta
- Shilalka iyo badbaadada.

## Hordhaca Cutubka

Waxay ardaydu ku baran doonaan Cutubka waxyaaba muhiim ah oo ku saabsan arrimaha dadweynaha, sida cudurka HIV/AIDS-ka caado dhaqameedyada halista ah, dhakhsa u korarka dadka, maamulka suuban, xuquuqda caruurta iyo shilalka iyo badbaadada.

Cashirkeena oogu horeeyaa wuxuu ku saabsan yahay HIV/AIDS ka iyo caadooyinka dhibaatada leh. Ardeydu waxay baradoonaan calaamadaha HIV/AIDS ka macmihiisa, wadooyinka lagu kala qaado iyo kahortagiisa, iyo macnaha iyo dabeecadaha caadooyinka dhiibaatada leh, iyo waliba xidhiidhka ka dhexeeya HIV/AIDS-ka iyo caadooyinka dhibaatadaleh. Waxaa kale oo intaadheer waxyeelada uu cudurka HIV/AIDS ku bulshada iyo dhaqaala heeda uu ku curyaamiyo.

Kadib, waxaan ugudagalayna aa saameynta dhakhsa ukorarka dadweynaha ayl eedahay. Waxaynu baran doonaa macnaha xaddhaafka dadweynaha, waxyaabaha keena dhakhso ukorarka dadweynaha, iyo saameynteeda.

Ugudambayntii, ardeydu waxay baran doon aan calaamadaha iyo muhiimada uu leeyahay maamulka suuban (xil kasnimada, mas'uuliyadacadcaddaanimada, u hogaansaanta sharciga, musuq la'aanta). Waxaa kale oo kahad lidoonaa xuquuqda caruurta iyo shilalka iyo badbaadadooda.

Kaabayaasha waxbraris iyo tixraacyada la'adeegsanayo

- Sawiro
- Khariirado
- Dastuurka dawladda Dimuqraadiga Federalka Itoobiya (DDFI)
- UNCRC-ta (Quruumaha midoobay qaybteeda u xilsaaran dhawridda ama ilaalinta xuquuqda caruurta)
- Kaydad xoggo horay loo soo tirakoobay.

# 4.1 Arrimaha Dadwaynaha

## 1. Ujeedada gaarka ah

***Marka ay bartaan cashirkan ardaydu waxay a woodi doonaan in ay***

- *Qeexaan HIV iyo AIDS – ka.*
- *Caddeeyaan macnaha iyo dabeecadaha caadooyinka xun xun.*
- *Aqoonsadaan caadooyinka xunxun ee kajira dalkeena Itoobiya kuwaas oo sahla in uu ku faafo ama u kala gudbo cudurka HIV/AIDS-ka bulshada.*
- *Ka doodaan sida ay isugu gudbiyaan caadooyinka xunxun una faafiyaan HIV/AIDS ka iyo*
- *Inay baadhaan saamaynta HIV/AIDS ka uu ku leeyahay xaaladaha hoose (Sirta ah) ee bulsho – dhaqaaled*

## 2. Tuusmooyinka hoos yimaada qaybtan

- HIV/AIDS ka iyo caadooyinka xun xun ama caado dhaqameedyada xunxun
- Isu gudbinta HIV/AIDS ka ay dadku isug-gudbiyaan caado dhaqameedyada xun xun.
- Saamaynta HIV/AIDS ka.

## 3. Araarta

AIDS ka waa cudur uu sababo naaqusid ama daciifidda difaaca jidhka aadamaha ku rido ama kukeeno fayraska ilima argatayga ah ee HIV. Fauarska HIV ga waa fayras dila ama waxyee leeya unugyada jidhka aadamaha ee (T.cells) (Unugyada – T). Fayraskan sida uu uwax- yeeleenayo ama uu udilayo unugyadaas ayuu waxuu baabi’inaya a awooda lada gaalan ama difaac ee uu jidhka aadamuhu iskaga difaaco cudurada kale.

Galmada aan amaanka ahayn, waxyaaba afka waxmuda ama sara leh oo lawadaago iyo hooyada oo naaskeeda nuujisa ilmaha ama dhiigooda oo istaabta xiliga ay uurka Leedahay ayaa kamid ah wadooyinka ugu waawey ee La’isugu gudbiyo HIV-ga. Ilaa iyo hadda majirto wax dawo ah oo la iskaga difaaci karo ayraska HIV-ga. Sidaa daraadeed jidka kaliya ee la iskaga ilaalinka fayraskan

waa iyadoo aan lasamaynin galmo bilaa ammaan ah oo uu qof walba ku ekaado xaaskiisa xalaasha ah, iyda oo uusan dhiigiinu istaabanin qof cudurka qaba iyo adigoona la wadaagin qabyada afaysan ee wax muda ama sara.

HIV/AIDS ka waa cudur masiiba ah oo u qoonsada nolosha malyano dad ah oo dunida daafaheeda ku kala nool. Hasa ahaatee dadka wadamada soo koraya, gaar ahaan Afrika ayaa ah mid ay masiibadani si aad u daran u asiibtay una saamaysay.

Wuxuuna si khaas ah ugu sii daran yahay wadamada Afrika ee ka hooseeya saxaraha ee ay Itoobiya kamidka tahay oo ah meelaha ay dharbaaxada ugu xun ee cudurku saamaysay. Waxay tani ka dhigantahay faafitaanka cudurkan ee wadamadaas aan soo sheegnay ayaa ah mida ugu saraysa dunida.

Faafida cudurka HIV? AIDS ka ee Itoobiya iyo wadamada kale ee Afrika ee ka hooseeya saxaraha waxaa keena caadooyinka xunxun ee bulshooyinka kala duwan ee ku nool wadamadan ay ku dhaqmaan.

Caado dhaqameedyada xun xun ee bulshada caafimaadkeeda waxyeelada xun u gaysta ayey qaar kamid ah oo ah caado dhaqameedyada ka jira Itoobiya iyo Bariga Afrika kuwaas oo usababa una horseeda bulshada khatarta HIV ga yihiin sidan soosocota:-

**Gudniinka Gabdhaha:-** waa gudniinka fircooniga ah ee deegaankeena ismaamulka soomaalida caanka ku ah. Waana googoynta waxyeelada iyo xanuunka badan ee qaybta taranka iyo dareenka ee gabdhaha loo gaysto.

**Afduubka**: waa xalada afduubka qasabka ah ee gabdhaha da'doodu yartahay loogu kaxaysto ee guurka qasabka ah ee ayna raaliga ka hayn loogu qabbo.

**Tumitaanka ama daldaloolinta jidhka**:- waa googoynta ama daldaloolinta jidhka ama qaybaha kaladuwan ee jidhka ama qaybaha kala duwan ee jidhka oo lagu dhigo calaamado ayada oo la isticmaalayo shay ama qalab afaysan (af soofaysan oo wax muda leh).

**Hilib-dalqaha:-** hab dhaqameedka la isk gagooyo hilib-dalqaha oo ah curjin yar oo hilib ah oo cunaha gudihiisa ku taala oo mindi afaysan la iskaga jaro oo

aalaa deegaankeena soomaalida ee Itoobiya si balaadhan uga jira ama looga isticmaalo.

**Qanjidhka**: iyana marka la iskagoynayo ayaa waxa caado ahaan isticmaalaa mindiafaysan.

Dumar badan guursiga balse inaga bulshadeena maadaama ay islaam tahay waxaa u banana ninka hadii uu awoodo in uu guursadoo Afar dumar ah waxa ase halis ah in dumar badan oo aan xalaal ahayn utagtid ood noqotid gododle.

Intooda badan caado dhaqameedyadan xun xun ka sakaw godad lenimada iyo qasab ku kaxaysiga gabdhaha, waxaa la adeegsadaa oo lagu fuliyaa shay ama qalab af leh (afaysan) oo aan nadiif ahayn ama sifaysnayn oo sababi kara isugudubka IHV/AIDS ka iyo cudurada kale ba.

HIV/ AIDS ka waxuu saamayn aad uxun ku leeyahay xaaladaha bulsho-dhaqaale ee shakhsiyaadka, qoysaska, bulshada iyo wadamada. Qaar kamid ah waxyeelooyinkiisa (saamayntiisa) ayaa waxaay yihiin kuwan soosocda

Waxuu ku dhacaa oo uu dilaa bulshada qaybteeda waxsoosaarka leh ee ay da'doodu udhaxayso 15 – 49 jirka, HIV/AIDS ku waxuu qoysaska, bulshada iyo wadamada u horseedaa saboolnimo qoto-dheer.

Waxuu ku dhacaa oo uudilaa dadka xirfadlayaasha ah ee waddan (macalimiinta, dhakhatiirta iwm) taas oo saamayn daran kuleh hawlaha hour marineed ee dhanka bulshada iyo dhaqaalaha ee dawlada.

Waxuu cudurku baabi'iyaa oo uu la dagaalamaa dhaqaalaha qoyska iyo ka dawlada oo ay maaliyad badan kaga baxdaa dhanka qalabyada adeega caafimaadka.

Waxuu cudurka HIV/AIDS ku badaa caruur badan oo uu waalidkood dilay in ay ku noolaadaan nolol xun iyo darbi jiifnimo oo ay nolasha iyagoo agoomo ah la tacaalaan.

Gabdhaha uu cudurka HIV/AIDS ku agoomaha iyo rajooyinka uu kadhigo ayaa waxuu ku qasbaa in ay ku kacaan dhaqan xumo ay ku kaliftay dhaqan xumo ay kamid tahay ka gan acsiga jidhkooda oo ay ku kaliftay waalid daryeela la'aanta.

# 4. Hababka baris barsho

**B. Adeegsiga kaabayaasha barista**

- Sharaxaad
- Labo labo ama koox – koox uga doodid
- Soojeedin
- Daraasaadyo
- Marti khaas ah kumarti qaadid

**T. Cashir diyaarinta horteed**

Kol kahore diyaarso kaabayaasha wax barista iyo qalabyada tixraaceed ee muhiimka ah.

**J. Soo bandhigida cashirka**

**B. Hordhaca Cashirka**

- Baraw ardaydaada ogaysii waxa ay baran doonaan.
- Baraw waxaad ku bilawdaa cashirka in aad baadho ama garatid waxaay ka yaqaanaan HIV/AIDS. Ka iyo caado dhaqameedyada xun xun ee halista ah ardaydu inta ay dhantay ama heerkeedu yahay. Adoo midan ka duulaya ku bilow in ay ka shaqeeyaan hawlgalka buuga ardayga ku yaala ee ay su'aalahan soo socda ay kujiraan
- Maxaad ka taqaantaa HIV?AIDS ka
- Sheeg oo sharax iyo kuwa wanaagsan ee agagaarkiin, dagmadiina iyo deegaankiina lagaga dhaqmo?
- Baraw caawi oo ku dhirigali (Kubogaadi) ardayda in ay si koox koox kooban ah ugadoodaan kanasoojeediyaan waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay kawada hadleen ardayda fasalka hortooda

**T. Nuxurka cashirka**

- Baraw waxaad ku bilawdaa soo bandhigida cashirkaaga macnaha HIV/AIDS ka iyo hababka ama wadooyinka la isugugudbin karo iyo kuwa la iskaga ilaalinkaro.

- Ufaahfaahi ardayda sida uu HIV/AIDS ku dunida ugu faafayo, gaarahaan Afrika, waliba wadamada ka hooseeya saxaraha ee ay Itoobiya kamidka tahay.
- Ardayda fahansii arimaha sida dhaqanka, caadooyinka iyo caado dhaqa ameed yada xun xun ama halista ah.
- Ku boori ama ku dhiirigali ardayda in ay cashirka qayb libaax ka qaataan adigoo waydiinay su'aalahan soosocda:-
- Caado dhaqameedyada noocee ah ayaa halis ah ama xun?
- Maxay yihiin caado dhaqameedyada xun xun ama halista ah ee lagaga dhaqmo Itoobiya?

U sharax ardayda guudniinka gabdhaha ama gudniinka fircooniga, qasab ku af duubashada ama ku kaxaysiga gabdhaha, hilib-dalqe iyo qanjidhka goynta, tumitaanka ama daldaloollinta jidhka iyo godadlenimada.

Marka aad sharaxayso ardaydu hala xidhiidhiyaan caado dhaqameedyada halista badan cudurka HIV/AIDS ka.

Waydii ama su'aal in ay sharxaan saamaynta waxyeelo ee ay caado dhaqameedyada xunxuni leeyihiin.

Waxaad hubsataa in ay fahameen ardaydu sida ay caadooyinka xunxun ay ugu horseedaan dadka HIV/AIDS ka.

Usharax sida uu u saameeyo HIV/AIDS ku xaaladaha bulsho dhaqaale ee dadka, uguna horseedo saboolnimo, agoomo iyo rajooyin, darbijiifnimo iwm.

Ku dhiirigali ardayda in ay afkaarahooda iyo su'aalaba soo bandhigaan.

Xili ku haboon inta aad kudhex rtid cashirka soojeedintiisa ayaa waxaad hubsataa in hawlgalada ku yaala ama ku qoran buuga ardayga in ay ardaydu kasoo shaqeeyeen iyo inkale.

## 5. Qiimaynta iyo dabagalka ha socodka

## B. Qiimayn

Waydii su'aalahan soosocda

1. Waa maxay HIV/IDS?
2. Sidee ayaa la isugu gudbiyaa HIV ga
3. Sidee ayaa la isaga ilaalin karaa HIV ga?

4. Sidee ayay oogu horseedaan caadooyinka xun xun ama halista ah ee soo socda dadka cudurka HIV/AIDS ka?

- Gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha
- Afduubka qasabka ah ee lagu kaxaysto gabdhaha
- Godadlenimada ama Dumar badan oo aan xalaal ahayn oo aad la kulantid ama u galmootid.

5. Sidee ayuu HIV/AIDS ku ugu horseedaa caruurta agoonimo iyo darbijiifnimo?

**T. Dabagalka ha socodka**

- Sii ardayda hawlgalo guri oo sii kaabayaasha fahankooda

7. Dulmarid ama Soo koobida Cashirka

Baraw waxaad samaysaa dulmar kooban oo aad cashirka soo dulmartid.

- AIDS ka waxaa keena ama sababa fayraska HIV ga kaasoo dila unugyada difaaca ee jidhka.
- Deegaanka ugu daran ee uu cudurka HIV/AIDS ku sida xun uwayeeleeyay waa wadamada Afrika ee kahooseeya ama koonfurta ka ah) saxaraha.
- Caado dhaqameedyada xun xun waa dhaqamo keena caafimaad daro inoona horseeda HIV/AIDS – ka
- Caadooyinka xun xuni waa kuwo lagu fuliyo xaalado halis u ah in ay kuu soo jiidaan halista Cudurka HIV/AIDS ka sababtoo ah waxaa la isticmaalaa mindiyo iyo sakiimo aan nadiif ahayn oo dad farabadan iyagoona labadalaynin loo adeegsadaa.
- Cudurka HIV/AIDS ku waxuu saamayn xun ugaystaa xaaladaha bulsho-dhaqaale ee shaksiyaadka, qoysaska, bulshooyinka iyo wadamada.
- Itoobiya waxaa kunool inkabadan hal malyan oo caruur agoomo iyo rajooyin ah.

# 4.2 Saamaynta Dhakhsa U Kororka Dadka

**Tirada xiisaduhu waa - 4**

## Ujeedada gaarka ah

***Marka ay dhigtaan cashirkan ardaydu waxay awoodi doonaan in ay***

- *Qeexaan dadka xad dhaafka ah.*
- *Aqoonsadaan qodobada keena dhaksha u kororka dadka.*
- *Sharxaan saamaynta ay dhakhsa ukorarka dadka kuleedahay bixinta ad eega bulshada sida waxbarashada iyo caafimaadka (xanaanada caafimaadka) iyo*
- *Inay ka doodaan sida uu dhakhsa u korarka dadka uu usababo kalaqayb qaybinta la sii kala googoosto dhulbeereedyada.*

## 2. Tusmooyinka hoos yimaada qaybtan

- Yaraanta ama kufilaan la'aanta adeega bulshada.
- Dhul beereed yaraanta /kufilaan la'a anta.

## 3. Araarta

Saamiga dhalasho ee aad ka usareeya ayaa sabab u ah dhakhsa ukororka dadka ee wadamada Afrika intooda badan ka jira. Korarka dadka ee wad amadan Afrika ayaa ah mid ka xawli badan kororkooda dhaqaale. Waxayna u kordhaan si ka baxsan heerka awooded ee khayraadka jira.

Dhakhsa u kororka dadka ee wadamo badan oo Afrikaan ah oo ay Itoobiya kamid tahay ayaa abuurtay ama keentay dhibaatoyin badan oo ay ku keentay dadka iyo dawlada aha wadamadaas. Dhibaatooyinkan waxaa kamid ah ku filaan la'aanta ama yaraaanshaha adeega bulshada sida xumaansha ha ama hoos udhaca tayada waxbarashada iyo caafimaadka (xanaanada caafimaad) iyo waliba dhul beereedyada oo aan kufilaanaynin oo ku yaraada dadka. Dhakhsa u kororka dadka waxay saamaysaa fidinta adeeg wax barasho oo haboon ama tayo leh, sababto ah waxay keeni:

- Waxaa kordhaya baahida dadka ee ay u qabaan  iskuulaad badan, macalimiin badan iyo adeegyada ama qalabyada kale waxbarashada taasoo laga yaabo in ay dawladu wada dabooli kari waydo.
- In ay iskuulada iyo fasaladuba six ad dhaaf ah ardaydu kudhigato waxbarashadooda
- Waxaa si aad ah u kordhaya tirade ama saamiga ardayda eek u aadaya halkii macalinba iyo saamiga ardayda eek u aadaya halkii macalinba iyo saamiga ardayda eek u aadaya buuga ardayga.

Waxay sido kale dhakhsa u kororka dadku saamayn aad u daran ku yeelanaysaa adeega ama tayada adeega caafimaad ee wadamada Afrika ee ay dhibaatadani ka jirto. Sababto ah.

- Baahida aadka ukordhaysa ee dadku uqabaan cisbitaalo badan, xarumo caafimaad oo iyana badan, sidoo kale dhakhaatiir iyo kalkaaliyayaal caafimaad oo iyana aad u tira badan iwm.
- Waxaa aad u saa'idaya saamiga bukaanada ee ku aadaya halkii cisbitaalba, iyo saamiga bukaanada ee halka dhakhtar ku aadaya.

Dhibaatooyinka kale ee uu dhakhsa uko rorka dadka ee wadamada Afrika intooda badan waxaa kamid ah dhulbeereedka oo lasii kala googosto marka, marka ay dadku aad u fara bataan ee ay u kordhaan in kabaxsan awooda dhulka labeero waxay ku qasbanaanayaan in ay dhul yar sii kala qaybqaybsadaan.

Xataa waxaa dhacda arintani in ay keento isqabsi iyo khilaafyo dadka dhexdooda ah oo ay isku qabqabsadaan dhulbeereedka iyo soohdimahood.

## 4. Hababka baris-barasho

**Adeegsiga kaabayaasha barista iyo tixraacyada.**

- Warbixino tirakoob
- Sawiro
- Khariirado
- Buuga ardayga

Adeegsiga habab wax baris

- Sharaxaad

- Dood kooxeed
- Soo bandhigid warbixino (xoggo)
- Daraasaad
- Qof –aad kumartiqaadid.

**Cashir diyaarinta kahor**

- Kolka hore diyaar garayso oo diyaar ha kuu ahaadaan dhamaan kaabayaasha wax barista ee aan kor kusoo sheegnay.

**Soojeedinta cashirka**

**B. Hordhaca cashirka**

Baraw usheeg ardayda cashirka ay baran doonaan waxa uu ku saabsan yahay.

Waxaad ku bilawdaa cashirkaaga kolka hore in aad tijaabisid aqoonta ama fahankooda hore ee ardayda inta uu dhanyahay ama ay cashirkaan waxa uu kusaabsan yahay ay ka fahansan yihiin. Ardaydu hak abilaabaan in ay kashaqeeyaan hawlgalka ku yaala buuga ardayga.

Ardaydu ha soo jeediyaan natiijooyinka doodahooda hawadaagaan waxyaabaha ooga soo baxa doodahooda.

**T. Nuxurka cashirka**

- Baraw soo jeedintaada cashirka waxaad kubilawdaa macynta fikrada ah dadka xad dhaafka ah
- Waxaad ardayda su’aashaa ardayda sida ay uarkaan kororka dadka ee degmadooda.
- Maxay idin latahay in ay yihiin sababaha ugu waaweyn ama muhiimsan?
- Maxay idin la tahay in ay natiijedeedu tahay

Waxaad usharaxdaa ardayda dhibatada dhakhsa u kororka dadka ay ku keentay dhaqaalaha iyo bulshada Itoobiya iyo wadamada kale ee bariga Afrika. Waxaad adeegsataa kaabayaasha wax-barista ee aan horay usoo sheegnay si ay kaaga caawiyaan kaabayaashaas sidaad si wanaagsan ugu fahamnsiin lahayd cashirka.

Waxaad U sharxda oo aad ka dhaadhicisaa oo kale ardayda sida uu dhakhsa u kororka dadka uu uwiiqo tayada adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka wadankeena Itoobiya iyo bariga Afrika dalalka kale ee ka mid ah amid ka ah iyo waliba guud ahaan Afrikaba. Waxaa kale oo uu sababaa dhakhsa ukororka dadku in uu aad oogu yaraado dhulku dadka siiba dhulbeereedka oo dhulbeereedyada aad loo siiqayb qaybsado.

Hala xidhiidhiyaan dhibaatada dhakhsa u kororka dadka xaalada wakhti xaadirkan ka jirta meelaha ay daganyihiin.

Waxaad ku martiqaada in uu cashirka kaala qayb qaato qof ka shaqeeya dhibaatooyinkan aan soo sheegnay oo khibrad u leh.

Wakhti munaasab ku ah  u dir ardayda in ay daraasaad soo sameeyaan

Ku dhiirigali ardayda in ay su’aalahooda dhiibtaan.

Waxaad hubsataa in ay ardayda dhamaanto od ka qaybqaateen hawlgalada intay hababka baris barasho socotay.

**J. Qiimaynta iyo dabagalka ha socodka**

## Qiimayn

1. Waa maxay dadka xad dhaafka ah
2. Maxay yihiin sabahakeena dhakhsa u kororoka dadka Itoobiya?
3. Sidee ayuu dhakhsa U korarka dadku u saameeyaa waxbarashada?
4. Sidee ayuu dhakhsa u korarka dadka inoogu horseedaa damaanad qaaad La’aanta cunada?

### Dabagalka ha socodka

Waxaad ardayda siisaa tilmaamo iyo jidad ku haboon oo ay kaga soo shaqeeyaan hawlgalada aad u dirtid.

**X. Soo koobid ama dulmarida cashirka.**

Waxaad naqtiin ahaan oogu noqotaa oo aad ardayda oogu celisaa meelihii ugu muhiimsanaa cashirka.

Dadka xad-dhaafka ah waxaa laga wadaa kororka dadka ee meel ama goobee ka baxsan awooda uu xamili karo khayraadka jira markaasi.

Dhakhasa u kororka wadamo badan oo Afrika ah oo ay Itoobiya kamid tahay waxaa sababa saamiga aadka usareeya ee dhalasho.

Dhakhsa ukorarka dadku waxuu saamayn halis ah ku Leeyahay helida adeeg waxbar asho iyo caafimaad oo tayo laeh.

Dhakhsa u korarka dadka darteed ayay helitaanka ama helidda adeeg waxbarasho iyo caafimaad oo tayo leh u sii xumaanaysaa wadankeena Itoobiya iyo wadamo kale oo Afrika ahba.

Dhakhasa u korarka dadka waxaa kale oo uu sababa in uu dhulku ku yaraado dadka oo dhulbeerdyada la siiqaybqaybiyo lagana yaabo in khilaafa ad kadhashaan.

Hoos udhaca dabiiciga ah ee waxsoosaa rka beeraha iyo cuna yaraanta sii siyaadaysa (damaanad qaadka cuno la'aanta) ee kajira waadamo badan oo Afrikaan ah ayaa ah mid ayay sababtay dhulbeereedka la sii kala qaybqaybiyey iyo beerida badan ee dhulka oo ay keentay dhakhsa u koraka dadka.

# 4.3 Maamulka suuban, Xuquuqda Caruurta, shilalka iyo Badbaadadooda

## 1. Ujeedada gaarka ah

Marka ay dhigtaan cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:-

- Sheegaan astaamaha dawlada suuban
- aqoonsadaan ujeedada shuruucda iyo xeerarka iskoolkooda.
- Qeexaan macnaha la xisaabtanka, masuuliyada iyo cadcadaanta.
- qeexaan musuqa, oo ay sharxaan faa'iidoooyinka musuq La'aantu Leedahay.
- Sharxaan xuquuqdooda, sida ku xusan heshiiski UNESCO ee xuquuqda caruurta caalamiga aheyd.
- gartaan sida uu yahay herka halista iyo shilalka aaga ay daganyihiin.
- gartaan habaka looga badbaa di karo shilalka.
- Kula taliyaan caruurta kale sidii ay iyaga laftigoodu isaga ilaalin lahaa yeen shilalka kala duwan

## 2. Tusmooyinka hoos yimaada qaybtan

- Maamulka suuban
- Xuquuqda caruurta
- Shilalka iyo badbaadadooda

## 3. Araar

Maamulka suuban waa maamulka ku dhisan cadaalad iyo qawaaniin macquul ah, shuruuc iyo waliba xeerar. Waxaa muuqaalada maamulka suuban ka mid ah la xisaabtanka, cadcadaanta, u hogaansanaanta sharciga iyo waliba musuqmaasuq la'aanta.

Waxaa kale oo ka mid ah dabeecadaha maamulka suuban ilaalinta xuquuqda caruurta. Caruurtu waxay xaqu leeyihiin in la xanaaneeyo lana ilaaliyo xuquuqahooda. Waxaa iyana waajib ku ah qof kasta in uu ilaaliyo xuquuqda caruurta iyo in uu naftiisa uga taxadaro shilalka iyo in uu ku dadaalo siduu uga badbaadin lahaa naftiisa shilalka.

## 4. Habka baris barasho

### 4.1 Adeegsiga kaabayaasha barista

- Sawiro
- Jaraa'id
- Filimaan muuqaal ah

### 4.2 Adeegsiga hababka wax dhigista

- Muuqaal ku tusid
- Su'aalo
- Shaqo kooxeed
- Sharraxaad

### 4.3 Diyaarinta cashirka kahor

- Qoraalo ku saabsan xuquuqda caruurta
- U dir ardayda in ay koox koox isu qaybiyaan soona diyaariyaan riwaayado gaa gaaban oo ku saabsan musuqa iyo ku xad-gudubka xuquuqda caruurta.

## 4.4 Soo bandhigidda cashirka

### B. Hordhac

Baraw inta aadan bilaabin cashirka fursad sii ardada oo ah ku soo bandhigaan afkaartooda ku aadan dhibaatooyinka ay leedahay maamul suuban la'aanta iyo ku xad gudubyada xuquuqda caruurta.

### T. Nuxurka Cashirka

- Baraw waxaad sharraxdaa waxa uu yahay maamulka suuban iyo dhibaatooyinka maamul suuban la'aaneed ee Afrika.
- Waxaad wax uga sheegtaa xuquuqaha caruurta ee in la dhawro ay tahay.
- Waxaa kale oo aad u sheegtaa iskaashiga faa'iidooyinka uu leeyahay iyo siday lagama-maarmaan u tahay in la yeesho iskaashi heer gobaleed ah ama mid heer caalami ah.

## 4.5 Qiimaynta iyo dabagalka

### B. Qiimaynta

waxaad waydiisaa su'aalahan:

- Musuq-maasuqu muxuu astaan u yahay?
- Xuquuqda caruurta side looga dhawraa aaga aad ku nooshihiin?
- Ma jiraa wax iskaashi urur ah oo aad idinka dhexdiinu leedihiin, oo kolba midka dhibaataysan aad ku caawisaan waxa aad u awoodaan?

### T. Dabagalka

Baraw axaad ardada u dirtaa in ay soo akhristaan dastuurka Fedaraalka ee Itoobiya qaybtiisa ku saabsan xuquuqda dumarka iyo caruurta.

# Jawaabaha Layliga Guud ee Cutubka 4aad

**I. "Run" ama "Been" kaga jawaab**

1. Run
2. Run
3. Run

**II. Isku Aadi**

1. T
2. Kh
3. B
4. D
5. X

**III. Buuxi meelaha banaan**

1. Afduubka gabdhaha
2. 15 – 49 jirka
3. Dhalmada badan
4. Maamulka suuban
5. Ej-Ay-Fi

**IV. Ka bixi jawaabo gaaban**

1. B. Gudniinka fircooniga ee Gabdhaha
   T. Afduubka gabdhaha
   J. Midab ku Samaynta jidhka
2. B. Dugsi ku filan oo aan la helin
   T. Fasalada oo tan dhaafa
   J. qalabka waxbarash oo aan wada gaadhin.
3. B. In ay helaan nolol
   T. In ay waxbarasho helaan
   J. In ay helaan daryeel waalid
4. B. Wuxuu hoos u dhigaa maal gashiga wadanka gudihiisa
   T. Wuxuu sababaa daganaan la'aan dhaqaale.
   J. Wuxuu yareeyaa maal gashiga dalka dibadiisa ka yimaada.
5. Waxaa jira shilal badan oo ku dhaca aadamaha ee waxaad fiira gaar ah u yeelataa kuwan soo socda
   - Waxaad mudnaanta sii saa marka aad waddo goynaysid in aad marto meesha loogu talagalay in dadku ka gudbaan
   - Iska ilaali xadhkaha korantada

## Cutubka 1aad: Daadka, Meelaha ay dhacaan iyo dagaanka Ethiopia iyo geeska Afrika Waa => 23, xisadood

## Muqararka fasalka 5aad ee Cilmiga Bulshada

## Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay tilmaamaan xidhiidhka iyo inay magacaabaan wadamada geeska Afrika.
- Inay magacaabaan iyo meeshii u horreysay ee qaramadii Itoobiya iyo geeska Afrika iyo inay fahmaan taariikh ahaan iyo siyaaso ahaan guulihii waa weynaa ee ay gaadheen qaramadii Itoobiya. Inay sheegaan Qaramadii hore ee Itoobiya iyo guulahoodii.
- Inay fahmaan himilooyinka ugu muhiimsan ilbaxnimada cusub.
- Inay aqoonsadaan qodobada muhiimka ah ee noocyada dagaameynta, dhaqanka iyo nolosha dadka dusha iyo Hundaha ku nool ee Itoobiya.

| Kartida | Tusmooyinka | Waxqabadka Lafilayo in laqabto. |
|---|---|---|
| • Ardaydu waxay awoodi doonaan:<br>• Inay tilmaamaan meesha uu yahay Geeska Afrika.<br>• Inay magacaabaan wadamada Geeska Afrika.<br>• Inays soo bandhigaan sida ay Itoobiya u laleedahay xidhiidh dariskeeda khariidad muujinaysa oo Afrika ah.<br>• Inay tilmaamaan caasimadaha iyago adeegsanaya goobta muhiimka ah. | 1. Meesha iyo wadamada geeska Afrika.<br>1.1. Goobta iyo wadamada geeska Afrika Waa => 4 xiso<br>▪ Xidhiidhka goobeed ee geeska afrika.<br>▪ Wadamada geeska Afrika | ▪ Sawir sabuuradda khariidada muujinaysa Afrika ama isticmaal hab kale layliga iyo waydiimaha oo tilmaan meesha geedka uu dhaco uuna xidhiidh u la leeyahay afrikada kale. Sida:- Ma waxuu dhacaa geesku galbeedka/waqooyi-galbeed i.w.m? isticmaalka jihooyinka muhiimka ah sharaxa dhexdiisa. Weydii ardayda inay maabka sabuurada ku qoraan ayna ku daraa Itoobiya, islamarkaana ay calaamadiyaan meeshey dhacdo Addis-Ababa.<br>▪ Marka xiga weydii ardayda inay taxaan darisyada sida; suudaan, |

| | | |
|---|---|---|
| • Inay caddeeyaan goobaha arkiyoolajiga Ethiopia iyo geeskaba.<br>• Inay bartaan arkiyoolajiga iyo waxtarka waxyaabaha laga helo.<br>• Inay fahmaan iyo inay awoodi karaan inay sharaxaan hor dhacii diimahii ugu waa weynaa Ethiopia iyo geeska Afrika.<br>• Inay fahmaan baahida loo qabo diimaha dulqaadkooda in ayna haeyn mid cusub.<br>• Inay tibaaxaan aqoonsiga waddankani inuu yahay mid waxyaalo badan laga rumeysan yahay.<br>• Inay tusaan siday u fahansan yihiin<br>• Qaramadii Ethiopia iyo geeska.<br>• Inay kala saaraan taariikhda iyo siyaasadda ay gaadheen qramadii waa weynaa.<br>• Inay sharaxaan waxtarkii midnimo ee keentay guushii Adwa.<br>• Inay ka doodaan saameynta ay ku leedahay soo bixiddii ilbaxnimada Ethiopia.<br>• Inay aqoonsadaan furaha qodobada wakiilka ka ah dagaameynta.<br>• Inay laxidhiidhiyaan qodobada dagameynta nolosha ka jirta Itoobiya iyo geeskaba.<br>• Inay sameeyaan | 1.2. Taariikhda dadka iyo dagaanka Ethiopia geeska Afrika Waa => 11, xisadood.<br>▪ Inay ogaadaan asalka adamiga; goobaha arkiyoolajiga Itoobiya iyo Kenya.<br>▪ Soo galidii diinta islaamka iyo kiristaanka geeska afrika.<br>1.3. Qaramadii ugu horeeyay ee Itoobiya iyo geeska Waa => 3, xiso.<br>▪ Bunt iyo damaat.<br>▪ Aksum<br>▪ Zagwe<br>▪ Muslim saltanets<br>▪ Wlaysta<br>▪ Damot<br>▪ Enaraya<br>▪ Kaffa<br>1.3.1. Guulaha taariikheed iyo siyaasadeed ee lagaadhay. Waa => 3, xiisadood.<br>▪ Aksumaaydyadii.<br>▪ Zagwiyadii<br>▪ Konsooyadii<br>▪ Harariyadii.<br>▪ Habkii gadadii ( oromadii iyo sidaamad)<br><br>1.3.2. Midnimada iyo ilbaxnimada Waa => 5, xiisadood.<br>▪ Midnimada ugu mihiimsan ee keentay guushii Adwa. | Kenya iyo inay magacaabaan meelaha ay khariidada kaga yaalaan. Hadda, weydii inay ku daraan magacyada badaha sida: indiyaanooshinta, gacanka cadmeed iyo badda casba.=> Ugu dambeyn weydii ardayda inay magacaabida ku daraan magaalooyinka caasimadaha ah.<br>▪ Isticmaal khariidada ay marto diyaaradda Ethiopia airlines ay marto kaas oo muujinaya booga shirkada meelaha ay katagto geeska Afrika. Eeg magaalooyinka caasimadaha ah. Usheeg adayda inay duusho diyaaraddu celceliska fogaan dhan xxxkm/h iyo inaad weydiiso jihad ay ku yaaliin maagaalooyinka caasimadaha, kadibna, jawaabahooda qor, muqdisho waxay dhacdaa koonfur bari i.w.m.<br>▪ Ardaydu waa inay buugagtooda ku qortaan , aadna dhammeystirto khariidada, aadna xisaabiso fogaanta ay Addis u jiraan caasimada kale geeska Afrika kadood sida ay u maleynayaan socdaalka |

| | | |
|---|---|---|
| isbarbardhig xaga farqiga ah nolosha, dhaqanka, dhalka sare, ka hoose, magaalooyinka iyo miyiga dadka Ethiopia. | ▪ Hordhicii ilbaxnimada (2 pd) ee keentay waxbarashada, hab lacageedka bangiga, wadada tareenka, Caafimaadka, isgadhsiinta, ciidamada adeegga boostada i.w.m.<br>1.4. Qodobada furaha u ah kala duwanaanshaha dagaameynta iyo dhaqanka, Waa=> 3, xiso. Kala duwanaanshaha digaameynta: cimilada, khayraadka iyo difaaca.<br>▪ Kala duwanaanshaha u dhaxeeya miyiga iyo magaalooyinka dhul-sare iyo hoose | hawada intee buu isbedel keeni karaa.<br>B) Adeegso khariidada dhab ah ama mid macmal ah oo ay ku socdaasho diyaaradu iyo xog waranba si loo abuuro hawlgal xiso leh.<br>▪ Waxaad ku bilawdaa ardayda weydiimo ay ku magacaabayaan hadhaagi walxihii hore waxay kamaqleen ee ay xasuustaan sida: Australopithecus afarensis (LUCY), Homosapien Ideltu (selam) .<br>▪ Weydii ardayda inay kuu sheegaanwaxay awoodaan intii adadan adigu u sharaxin, sabuuradda ku qor magacyadooda. Ardayduna waa inay magacyada gaadhaashooda ku qoraan wixii macluumaad ah, kadibna waxaad bartaa ardayda wixii xuus mudan ee hadhaaga ah. Marka xigana waxaad kala doodaa taxanaha taariikheed ee hadhaaga. Waana inay ku caaiwiyaan qoraalka magacyadooda oo nadaamsan in ay kugula qoraan sabuurada. Ardaydu kadib haku qoreen taxa liistada buugagtooda. |

| | | |
|---|---|---|
| | | B. Baruhu waa inuu kudaraa cilmi baadhis dhab ah oo aysameeyeen aqoon yahanada Itoobiya sawirkooda oo muujinaya shaqadooda. Ku billaw baraw cashirka weydiimo si looga doodo koox ahaan iyo inay warbixin ka dhiibaan waxay barteen ee ku saabsan diimaha ugu waa weyn imaantin koodii ay yimaadeen Itoobiya. Baraw, ku qor sabuuradda liistada diimaha, iyadoo dardaydu ay qorayaan wixii macluumaad ah ee ku saabsan mid waliba. Marka xiga waxaad bartaa ardayda cashirka adigoo adeegsanaya kaabyaaal cusub, xaaladda cilmibaadhista oo xogga taariikhooyinkii hore ee ku saabsan hordhicii diimaha iyo soo xigashada kitaabadii hore ama buugagtiiba, marka xiga, weydii ardayda haddii ay arki karaan wax kala duwanaansho ah iyo wax isu'ekaan ah oo u dhexeeya mar hore iyo haatanba. Haka hadleen ardaydu wax ku saabsan Itoobiyada ay ku noolyihiin sida ay uga maqsuudka yihiin midnimada noocyada dadka iyo noocyada aan kala burburka laheyn ee dalka. |

| | | |
|---|---|---|
| | | B. Baruhu waa inuu sameeyo baadhis cilmiyeed ku salaysan ila dhab ah oo buugag wax laga soo xigta ah.<br>▪ Ardayda waa inay sheegaan meesha ay dhacdo Ethiopia iyagoon isticmaalaya khariidad. Waxaad sii saa ardayda sharax gaaban oo ku saabsan qaramadi hore ee Ethiopia iyo geeska sida buntida iyo damaada (punt/damat). Koox yhar doodeeda waxay dhiiri galin inay ardaya u suuro gasho inay tilmaamaan qaramadii hore ee Ethiopia kuwaas oo laga helayo meelo kala duwan oo dalka ah sida: Aksum, Zagwa, Masslim sultanet, Wolaita, Damot, Enarya iyo Kaffa.<br>▪ Ardaydu haqoreen warbixin ku saabsan guulihii ay gaadhay Aksumite ee xagga taariikhda iyo siyaasaddaba, sidoo kale; Zagwes, goonderian, konsoes, harari iyo oromes iyo habkii sidama gaada sida: Aksuum.=> Taalada, zagwe.=> kaniisadaha lalibela, goodheeriyaanada => Qalcada oromo iyo sidama => habka gooda. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ Weydii ardayda inay sharaxaan sida Itoobiya ku ay u midoobeen si ay u jabiyaan talyaaniga, sidoo kale waa inay qoraan qoraal gaaban oo ku saabsan guushii Adwa waana inay ka doodaan koox walba waa inay qortaa gabayo ama heeso ku saabsan dagaalkii. Weydii ardayda inay si kooban u sheegaan waxay ka yaqaanaan soo ifbixii ilbaxnimada Ethiopia qarniyadii 19$^{aad}$ iyo horaantii qarnigii 20$^{aad}$. Ardaydu waa inay sameeyaan dood ku saabsan saameynti ay u keetay ilbaxnimadu dhanka waxbarashada, ganacsiga iyo bangiyada, isgaadhsiinta iyo caafimaadka. Wakiil kooxda ah waa inuu soo jeediyo waxyaabaha laga helay.<br>▪ Waa in lasoo bandhigo ama uu fasalku doodiisa ku muujiyo faa'iidooyinka iyo faa'iido darada ilbaxnimada ay leedahay. Shaqo kooxeed afar qeybood ah: Kooxda 1aad: Miyiga dhulka sare. Kooxda 2aad: magaalooyinka dhulka sare: Kooxda 3$^{aad}$: |

| | | |
|---|---|---|
| | | Miyiga dhulka-hoose; Kooxda 4[aad]: magalooyinka dhulka – hoose => Waxaad siisaa koox waliba meel gaar ah sida xaaladda cilmi baadhista iyo inay aqoonsadaan goobta khariidadu ee buugooda ku taalla ama sabbuuradda. => Weydii ardayda, koox walba inay qorto wax ku saabsan waxay heleen, waa inay sharaxaan sida ay u saameeyso cimilada guriyeynta, huga, beeraha iyo ganacsiga iyo sidoo kale, dhaqanka boogaha cinwaankooda iyo farqiga kala duwan ee goobahaas u dhexeeya |

## Qiimeynta

1. Baruhu waa inuu sameeyo qiimeyn joogto ah oo uu ku sameeyo shaqadda ardayda cutubkoo dhan, sameeyana isbarbardhig sharaxa soo socda ah, isagoo ku salaynaya ujeedooyinka gaarka ah si uu go'aan uga gaadho in ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa iyo in kale.

## 2. Dayda shaqadeedu gaadhay heerkii looga baahnaa

Waxay awoodi doonaan; Inay tilmaamaan meeshay ku taalo Ethiopia marka loo eego xagga wadamada dariska la'ha. Inay taxaanwadmada geeska ku yaala, inay tilmaamaan horraantii diimaha waa weyn ee Itoobiya markii ay soo galeen iyo geeskaba, inay aqoonsadaanwada-noolaanshaha, kala duwanaanshaha diimaha, fahamka xaaladda Ethiopia iyo geeska: Inay kala soocaan

muhiimmadda taariikhada iyo heerka siyaasadda qaramada; Inay tilmaamaan qaramada Ethiopia iyo kuwa geeska; Inay sharaxaan waxtarka midnimada ee guushii Adwa, inay ku doodaan saameynta ay ku leedahay hordhicii ilbaxnimada Ethiopia, Inay laxidhiidhiyaan qodobada dgaameynta nolosha Itoobiya iyo midda geeska Afrika; inay aqoonsadaan qodobada wakiilka ka ah kala duwanaanshaha dagaameynta; Inay isbabardhigaan xaaladda nololeed ee iyo midda dhaqameed ee dhulka-sare iyo midka-hoose ee Itoobiya.

## 3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirigaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhiganin.

## 4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa

Waxay u baahan yihiin in la'siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la'siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.

## 5. Hannaanka qiimeynta

Waa in baruhu siiyo fiiro gaar ah iyo caawinta lagama-maarmaanta u ah ardayda qabta baahida gaarka ah (special needs).

# Cutubka 2aad: Dhulka iyo waxa ku xeeran Waa=> 10, xisadood

## Maxsuulka cutubkan: Ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay khariidad u sameeyaan dugsigooda iyo hareerihiisa ku saabsan.
- Inay sharaxaan saameynta uu leeyahay dhaqdhaqaaqa dhulka.
- Inay aqoonsadaan khayraadka biyaha ee joogtada ah iyo kuwa xilliga ah ee Ethiopia

| Kartida | Tusmooyinka | Waxqabadka Lafilayo in laqabto. |
|---|---|---|
| Ardaydu waxay awoodi doonaan :<br>▪ Inay sharaxaan isticmaalka.<br>▪ Inay sharaxaan sida loo sawiro khariidad.<br>▪ Inay diyaariyaan khariidad muujinaysa meesha uu ku yaalo dugsigooda.<br>▪ Inay aqoonsadaan qaababka iyo dhaqaaqa dhulka.<br>▪ Inay la xidhiidhiyaan saameynta ay ku leeyihiin xilliyada hawlaha dhaqaalaha ee beeraha iyo xoolo dhaqashada.<br>▪ | 2. Dhuulka iyo waxa ku wareegsan<br>2.1. Meeshaan ku naallo , Waa => 4, xiso<br>▪ Isticmaalka khariidad si loo muujiyo jihada iyo meesha (goobta).<br>▪ Sameynta khariidad fudud.<br>2.2. Qaabka dhulka, dhaqaqa iyo saameyntiisa Waa => 4, xiiso.<br>▪ Qaabka dhulka dhaqdhaqaqa dhulka iyo saameyntiisa.<br>▪ Maalin iyo habeenka.<br>▪ Xilliyada.<br>▪ Janjeerka dhulka iyo xilliyada.<br>2.3. Saameynta xilliyada ay saameeyaan beerashada iyo xoolodhaqashada.<br>▪ Xilliyada Ethiopia.<br>▪ Saameynta xilliyada waxqabadka beeraha iyo xoolaha | ▪ Isticmaalka khariidada aad sameysay si ay u tusaan jihada iyo goobta, adigoo sabuuradda dusheeda adiga iyo fasalka ku diyaarinaya qorshe, cabbir gidaarada iyo qolal dugsiga. Kadibna, weydii ardayda inay dhigaan albaabka, daaqadaha iyo qalabka dugsiga. Marka xigana ka dooda khariidada saambulka dugsiga khiyaaliga ah eed ku dhigteensabuuradda dusheeda. Meeshaa waa inay ahaadaan calaamadaha dhulka. Sida; astaan muujineysa kilinig ama fayo dhawre, iyo fallaadh tusaysa dhanka waqooyi. Kahadal muuqaalada khariidada ay tahay inay ku isticmaalaan.<br>▪ Marka xiga, weydii ardayda inay furan |

| | | |
|---|---|---|
| | | buugagtooda, hadda, waxaad sawirtaa qaab muujinaya dugsiga sabuuradda dusheeda, kadibna, ka dooda dhinaca warqooyiga ama koonfurta ah idinkoo raacaya duhurnimada maalin cadceed jirto, waydii ardayda inay sawiraan khariidad ay leeyihiin oo ay ku muujiyaan waxyaabaha muhiimka ah sida; jidadka, wabiyada ama dhismayaasha. Waa inay magacaabaan wax kasta oo ay ka imd dhigaan fallaadha tusaysa dhanka waqooyi.<br>▪ Ardaydu waa inay diyaariso galoolbka iyo toosh ay ku ifiyaan muuqaalka qaabka iyo dhaq-dhaqaaqyada dhulka iyo saameynadiisa sida; isbedelada maalinta iyo habeenka, xiliyada sida; guga, xagaaga, jiilaalka iyo dayrta. Weydii ardayda inay soo aruuriyaan sawiro ku saabsan xilliyada waddanka iyo kuwo muujinaya qeybo ka mid ah dunida. Xisada soo socotana fasalka kala dood waxqabadkiisa.<br>▪ Weydii ardayda inay |

| | | |
|---|---|---|
| | | sameeyaan moodhal dhulka ah, marka xigana, sia y u tusaan meesha uu dhulku kala xidhiidho cadceeda iyo sida uu isu janjeeriyo si ay uga dhashaan xilliyada ku sawir dhulka meeshuu ku yaalo sabuuradda dusheeda.<br>▪ Isbarbardhig labo xaalad waxbarasho oo ah xagaagii iyo jiilaalkii waxqabadyada laga qabto dhulka-sare, dadibna, kuwa laga qabto dhulka hoose. Arintanna kala dood fasalka. |

## Qiimeynta

Baruhu waa inuu ku sameeyo qiimeyn joogto ah shaqada ardayda inta uu socdo cutubka, waana inuu isbarbardhig ku sameeyo sharaxa socda, kuma saleysna u jeedada gaarka ah, si uu go'aan uga gaadho in ardaygu uu gaadhay heerkii shaqo eel oo baahnaa iyo in kale.

## Ardayda gaadhay heerka shaqo ee larabay

Waxay awoodi doonaan; Inay aqoon sadaan khariidad; Inay sheegaan talaabooyinka lagu sameeyo khariidad.

- Inay sawiraan khariidada ku saabsan dagaanka dusigooda; Inay aqoonsadaan qababka iyo dhaqdhaqaaqyada dhulka; Inay sharaxaan saameynta dhaqdhaqaaqa dhulka, inay la xidhidhiyaan saameynta xilliyada xagga dhaqaalaha, hawlaha beeraha iyo xoolo dhaqashada.

## 3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda.

Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

# Cutubka 3aad: Deegaanka Waa => 19, xisadood

## Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan:

| Kartida | Tusmooyinka | Waxqabadka Lafilayo in laqabto. |
|---|---|---|
| Ardaydu waxay awoodi doonaan:<br>▪ Inay aqoonsadaan noocyada dhirta dabiiciga ah ee Itoobiya iyo geeska.<br>▪ Inay taxaan noocyada waa weyn ee xayawaanada duur jooga ah ee Ethiopia iyo geeska.<br>▪ Inay kala soocaan xayawaanada caadiga ah iyo kuwa Ethiopia u gaarka ah iyo geeskaba.<br>▪ Inay caddeeyaan waxtarka dhirta dabiiciga iyo xayawaanada duur joogga ah ee dalka iyo geeska.<br>▪ Inay fahmaan waxtarka ay leedahaysababda iyo xayawaanada dabiiciga ah.<br>▪ Inay sharaxaan sababta ay muhiim u noqotay ilaalinta dhirta iyo xayawaanada.<br>▪ Inay baadhaan raadadka ay ku leeyihiin dhaqso u bixida beesha dhirta iyo beesha xayawaanada duurjooga ah ay ku leeyihiin nolosha dadka.<br>▪ Inay aqoonsadaansiday uga qeyb qaadaan lahaayeen hawlaha lagu dhawrayo kharyaadka.<br>▪ Inay tilmaamaan hababka ugu waa weyn ee loo dhawri karo | 3. Deegaankeena.<br>3.1. Noocyada waa weyn iyo kuwa waxtarka leh ee dhirta dabiiciga ah ah iyo xayawaanada duurjooga ah Waa => 4, xiiso.<br>3.1.1. Noocyada muhiimka ah ee dhirta dabiiciga ah:<br>▪ Keymaha, dhulcawseedka, iyo lamadagaanka.<br>▪ Dhirta Itoobiya iyo geeska.<br>▪ Noocyada xayawaanada dibada jooga ah sida; kuwa caadiga ah, kuwa caanka ah iyo kuwa haliska ku ah dadka iyo sabadooda.<br><br>3.1.2. Waxtarka dhirta dabeeciga ah iyo xayawaanada dibad-joogga ah. Waa => 4, xiso.<br>▪ Ilaalinta isdheelitirka dabeeciga ah ee u dhaxeeya dibad-jooga iyo dhirta.<br>▪ Sidii ay beeraleyda | ▪ Waxaad ku sawirtaan khariidad sabuuradda dusheeda, ka dooda wax ay yihiin kayn, dhulcawseed iyo lamadagaan, waydiina ardayda inay tusaalooyin ka bixiyaan, weydii ardayda inay calaamadeeyaan goobaha khariidada ku yaala ee sabbuuradda dusheeda. Dhammeystir khariidad iyagoon ay ardaydu kula shaqeynayaan. Kadib, ardaydu haku qoreen buugagteeda.<br>▪ Weydii ardayda xayawaanada caanka ku ah Itoobiya iyo iyagoon u sameeyna shax haku qoreen buugagtooda meelaha laga helo xayawaanada. Ka dood iyo inay qroaal tax ah ka sameeyaan xayawaanada halista ah iyagoo ka |

| | | |
|---|---|---|
| khayradka dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjooga ah.<br>▪ Inay la’xidhiidhiyaan hawlahaas deegaanka ka socda iyo dhawrida la’xidhiidha.<br>▪ Inay tusaan fahamkooda xayawaanada gaarka ah dalka iyo geeskaba. | yio dibad-jooga ay ugu wadanoolaan lahaayeen si habsami ah.<br>▪ Dalxiiska iyo faa’iidadiisa uu u leeyahay bulshada, xaywaanada iyo beeraleyda.<br>3.1.3. Saameynta ay leeyihiin dhaqso u kororka beelaha dhirta dabiiciga ah iyo duurjoogta Waa => 4, xisadood.<br>▪ Dhirta baa’b’day<br>▪ Xayawaanka cararay khayraadka keymaha yaraaday.<br>3.1.4. Dhawridda dhirta dabiiciga ah iyo duurjoogta Waa => 4, xiiso.<br>▪ Dhireynta, tallaalidda dhirta iyo in laxakameeyo dabka kaymaha.<br>▪ Ka fogaanshaha ugaadh sharcidarada ah.<br>▪ Beeraha xayawaanada qaranka dalka iyo ururada dhawra deegaanka Waa => 3, xisadood. | soocaya kuwa kale. Kadib; Ardayda waxay qorikaraan xayawaanada caanka ah ee Ethiopia qormo ku saabsan iyagooy kula shaqeynayaan ardaydu.<br>▪ Ka dood wax dhaca haddii aan cunto la’siinin xayawaanada duurjooga ah ama ayna helin, marka laga baabi’iyo dagaamadooda iyo sabooyinkoodaba. Weydii ardayda tusaalooyin inay ka bixiyaan wax ay maqleen, weydii ardayda tusaalooyin inay ka bixiyaan wax ay maqleen, weydii ardayda haddey filayaan inay waxtar leeyihiin qeybahas si loo ilaaliyo hidaha xayawaanada dalka.<br>▪ Waxaa jira dadka daga miyiga iyo tuulooyinka inay laayaan duur jooga ah, kuwaas oo beerahooda iyo midhahaba ka baa’iya, Haddaba, waa inaad ardayda kala doodaa sidii loo dheelitiri lahaa dheelitirka baahida dadka iyo |

| | | |
|---|---|---|
| | | xayawaanada dibad jooga ah, si ay u wada noolaan karaan.<br>▪ Ardaydu waa inay ka doodo qeybaha dhirta dabeeciga ah iyo xayawaanada dibad-jooga ah sida ay u soo jiidan karaan dalxiiska dalka iyo geeskaba. Kadood sida uu dalxiiska dalka uu u leeyahay faa’iidada, adeegso goobo cilmi baadhis oo dhab ah. Qor sabuuradda korkeeda saddex cinwaan oo kala ah; dhirta xaaluftay, xayawaanada cararay iyo keymaha isdhimay. Waydii arday inay ka dhiibaan waxa ay ka yaqaanaan tusaalayaal iyo inay ku qoraan cinwaanadaa hoostooda.<br>▪ Ardaydu kadib, waa inay qoraan layliyo ka hadlaya waxay qabanayaan. A. Si looga ilalaiyo waxyaabaha ku imaan kara. B. Iyo inay talooyin sameeyaan kusaabsansidii loo bedeli lahaa iyo sidii loo hagaajin lahaa |

| | | |
|---|---|---|
| | | xaaladda.<br>▪ Weydii ardayda waxa loo ilaalinayo xayawaanada duur-joogga ah iyo dhirtaba. Waa inay aqoonsadaan iyo inay ka doodaan goobaha keymaha cusub leh ama dib-loo dhireeyay. Kadood sidii looga qeyb qaadan lahaa dhireynta, ilaalinta goobaha caanka ah iyo ka ilalainta dabka deegaanada duur-jooga.<br>▪ Ka samee cilmibaadhis meelaha lagu xanaaneeyo xayawaanada haddii uu leeyahay dagaanka dugsigu ku yaalo.<br>▪ Door muhiim ah: Ardaydu waa inay helaan dadka u gaadhsada sinjiyada ladhawro si ay u dishaan. Marka, koox waliba haqaateen goob mucayin ah, kadibna ha'ilaashadeen. Ardaydu ha'isku dayeen inay ka dhaadhiciyaan ugaadhsatada in la'laayo duurjooga inay tahay khalad. Ugu dambayna, |

| | | |
|---|---|---|
| | | ardaydu haka doodeen faa'iidada iyo faa'iido darada ay leedahay ugaadhsiga xayawaanada duur-jooga ah. Ardaydu waa inay qoondeyaan inay sameeyaan tabeelayaal muujinaya in ugaadhisigu uu sharci daro yahay, maabi'inta kaymaha i.w.m waa in loo qotomiyo tabeelayaashaas.<br>▪ Ardaydu waa inay kudaraan beeraha xayawaanka qaranka maabka dalka oo buugagtooda galiyaan. Kadood adiga iyo ardaydaba sida dhirta dabiiciga ah sida ay waajib u tahay ilaalinta xayawaanka iyo haddii sabadu ay baabaday, inay xayawaanadu ay ka cararaan ama ay ku tarmi waayaan.=> u sheeg ardayda ururka ilaaliya deegaanka iyo xayawaanada ( beesha duurjoogta dalka), UNEP.<br>▪ Dawr muhiim ah; labo qof ayaa doonaya inay dilaan |

| | | |
|---|---|---|
| | | qeybo ka mid ah xayawaanada naadirka ah, meesha labo kalena ay ka soo horjeedaan laynta xayawaanadaas.<br>▪ Ardaydu haka doodaan waxay qabanayaan iyo kadib, waxay qaban karaan inay ilaaliyaan duurjoogta goobahooda haddii ay ku noolyihiin goobo miyi ah, waxay yeelan karaan kooxo ama kalaabyo arintaas fiiro gaar ah siiya. |

## Qiimeynta

1. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda Heerka shaqadeedu ay gaadhay heerkii la'rabay

Waxay awoodi doonaan: Inay aqoonsadaan noocyada dhirta dabiiciga ah ee dalka iyo geeska; inay taxaan noocyada xayawaanada duurjooga ah ee dalka iyo geeska. Inay kala soocaan xayawaanada gaarka u ah dalka; inay caddeeyaan waxtarkka dhirta iyo duurjooga dalka iyo geeskaba; Inay baadhaan saameynta daqsada ah kororka beesha dhirta iyo duurjooga; Inay bilaabaan ka qeybgalka hawlaha lagu dhawrayo dhirta dabiiciga iyo duurjoogaba.

## 3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay;

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

## Cutubka 4[aad]: Arimaha Dadweynaha (Public Agenda), Waa=> 16 xiisadood.

## Maxuuslka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan;

- Inay sharaxaan caadooyinka laqabatimay ee dhibta leh oo keeni kara Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka iyo saameynta uu ku leeyahay dalka. Inay baadhitaan ku sameeyaan kororka dhaqsaha badan ee dadweynaha. Inay tilmaamaan muuqaalada guud ee maamulka iyo xuquuqda Caruurta. Inay shilalka la'xidhiidhiyaan farsamooyinka ay kaga badbaadi karaan dhibkooda.

| **Kartida** | **Tusmooyinka** | **Waxqabadka Lafilayo in laqabto.** |
|---|---|---|
| ▪ Araydu waxay awoodi doonaan.<br>▪ Inay sharaxaan caadooyinka lagu dhaqmo ee dhibta leh u gudbina kara dadka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka.<br>▪ Inay baadhid kusameeyaan caadooyinka la'gu dhaqmo sameynta ay leeyihiin. Sida; Gudniinka gabdhaha, Kufsiga, iscaddeynta i.w.m.<br>▪ Inay kadoodaan, fahmaana sababta ay aanada ugu yihiin agoonta iyo dibjirka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka<br>▪ Inay tilmaamaan yaraanshaha adeega bulshada iyo yaraanshaha dhulbeeredyada sida uu u saameeyo daqsaha kororka dadweynaha dalka.<br>▪ Inay aqoonsadaan in | ▪ Arimaha dad weynaha.<br>4.1. Arimaha bulshada Waa=> 4, xiso.<br>▪ Ej-Ay-Fi/Aydhis iyo caadooyinka dhibta leh.<br>▪ Gudbinta Ej-Ay-Fi/Aydhis oo laxidhiidha HTP (Kufsiga, Gudniinka gabdhaha iyo midabku sameynta jidhka i.w.m).<br>▪ Saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhis oo ah natiijadiisu agoomo iyo caruur dibjiriin ah.<br>4.2. Saameynta dhaqsaha kororka dadweynaha, Waa=> 4, xisad.<br>▪ Yaraanshaha dhulbeereedka.<br>4.3. Maamulka suuban, xuquuqda Caruurta iyo badbaadadooda, Waa=> 2, xisadood. | ▪ Ardaydu waa inay ka doodo caadooyinka dhibta leh ee lagu dhaqmo ee ka jira degmadooda.<br>▪ Ardaydu waa inay wax iska weydiiso sida dhaqamada dhibta leh ee lagu dhaqmo ay dadka ugu keeni karaan Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka. U samee arday hordhaca cashirka labaranayo. Kadibna, ardayda wax ka weydii inay tusaalooyin ka bixiyaan qooysaska ay yaqaanaan ee leh caruuro agoomo iyo kuwo dibjiriin ahba.<br>▪ Hala siiyo ardayda tirada fasal walba oo dugsiga ah sanadkan iyo tirada wadarta isdiiwaan galisay iyadoo labarbardhigayo toban (10) kii sano ee la'soo dhaafay. Ardaydu haka doodo sida ay tani u saameyso dugsiga iyo inay qoraan warbixin gaaban.<br>▪ Baadhid-cilmiyeed. |

| | | |
|---|---|---|
| sharciyada iyo maamulka dugsigu ay yihiin kuwo muhiim ah.<br>▪ Inay qeexaan macnaha ay leeyihiin;<br>▪ Xilkasnimada, masuuliyadda, cadcaddaanimada iyo musuqmaasuqa.<br>▪ Inay fahmaan hay'adda ilaalisa xuquuqda Caruurta (Unesco).<br>▪ Inay bartaan xuquuqdooda aasaska ah<br>▪ Inay aqoonsadaana wooda halista meeshey ka imanayso dagaanka ku xeeran.<br>▪ Inay caddeeyaan qoraana xeerarka badbaadada.<br>▪ Inay waaniyaan dadka kale ilaalinta naftooda. | 4.3.1. Maamulka suuban.<br>▪ Muuqaalada maamulka suuban (xilkasnimada mas'uuliyada, cacaddanimada, u hogaansanaanta sharciga, musuqmaasuqa la'aanta).<br>4.3.2. Xuquuqda Caruurta Waa => 3, xiso.<br>▪ Xuquuqda ilmaha (inay lahaadaan magac iyo dhalasho.<br>▪ Inay dugsiga aadaan, in laga ilaaliyo wixii dhib ah ee sharciga ka soo horjeeda.<br>4.3.3. Shilalka iyo badbaadada waa => 4, xiiso.<br>▪ Jidka<br>▪ Dhibta xoolaha.<br>▪ Daadadka iyo dababka | Ardaydu waa in la'weydiiyo waalidkood ama dadka kale ee ku saabsan sababaha ugu waa weyn ee bulshadu ayna u haysanin adeegyada muhiimka ah iyo inay sameeyaan qoraalo. Waxay u soo jeedinayaanw axay helaan fasalka.<br>▪ Weydii arday sida ay u saameeyaan dhulbeereedka iyo daqsinta kororka dadweynaha. Qor saameynta sabuurada dusheeda kadibna, wax ka weydii, si ay u qoraan rabood gaaban.<br>▪ Cashir ka bixi hal goob. Dood ka samee sida uu u maamulo madaxa dugsiga, maclimiinta iyo ardayduba. Weydii ardayda inay sawiraan shaxan sabuuradda dusheeda. Samee labo saf oo sabuurada dusheeda ah, mid waxuu noqon xuquuqda iyo midka kalena; masu'uuliyad. Caawi ardayda si ay u dhammeystiraan taxa qoraalkooda. => Ardayda weydii inay tusaalooyin ka bixiyaan baahida looqabo in dugsdiga la'ilaaliyo. Tusaale u xoogshegashada iyo ku ilaalinta xeerka dugsiga oo caawiya.<br>▪ Ka dood sida dastuurka goobta sida uu u abaabulan |

| | | |
|---|---|---|
| | | yahay sida; tuulada, dagmada iyo doorka booliska. Adeegso maalinta booliska cashir ahaan.<br>▪ U sheeg ardayda inuu jiro heshiis caalmai ah oo kusaabsan xuquuqda Caruurta, weydiina inay qoraanwaxa ay u maleynayaan xuquuqda, waana sinay kuqoraan dhinaca bidix ee sabuuradda. Si toos ah uga dood. => Hadda waxaa sharaxdaa xuquuqda asaasiga ah ee heshiiska UNISCO.<br>▪ Marka xiga, ku qor dhanka midigna "mas'uulid" weydiina ardayda inay dhammaystiraan.=> Inta cashirku socdo badhid ku samee ilmaha halista qaba.=> Dhiirigali Caruurta inay ka doodaan khatarta soo foodsaarta Caruurta guriga ama deegaanka iyo xallinta suurogalka ah.<br>▪ Ardayda ha'ka hadleen dhillalka jidka ee ay arkeen.=> Weydii ardayda sida ay badbaadadu noqon la'heyd xagga sharciga iyo inay qoraan waxa ku saabsan arinkaa sabuuradda dusheeda iyagoon adeegsanaya.<br>▪ Kooxaha ardayda ha sameeyeen sawir gacmeed gidaarka la'sudho dugsiga dhexdiisa kaas oo |

| | | |
|---|---|---|
| | | muujinaya badbaada waddooyinka.<br>▪ Ardaydu waa inay ka doodaan meelaha xayawaanada lagu dhiba ama lagu cadibo (haba ka mid ahaadee maska wax qaniina) kadibna, kooxaha ay sameeyaan tabeelooyinka badbaadada oo ka mid ah waxay qaban lahaayeen haddii la'soo weeraro.<br>▪ Ardaydu waa inay ka doodo daadadka iyo dababka iyo inay midkasta ka qoraan xogta ama warbixinta badbaadada. |

## Qiimeynta

1. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo eel oo baahnaa

Waxay awoodi doonaan: Inay sharaxaan dhaqanada lagu dhaqmo ee dhibta leh kuwaas oo dadka ugudbin kara Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka; Inay tilmaamaan ama ay ka doodaan aqoonta iyo dadka dibjirka noqday sida uu u saameeyo cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka; Inay tilmaamaan yaraanshaha adeegyada dadweynaha iyo yaraanshaha adeegyada dadweynaha iyo yaraanshaha dhulbeereedka sida ay saameyn ugu leeyihiin dhaqso u kororka dadweynaha dalka.

Inay aqoonsadaan muuqaalada maamulka suuban; Inay aqoonsadaan shilalka hareerahooda ka dhaca iyo lalaabooyinka badbaadada ah ee laga qaadi karo; Inay helaan farsamooyinka badbaadada ah ee shilaalka ka dhaca dagaanadooda i.w.m.

## 3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

5. Hannaanka qiimeynta waa inuu baruhu siiyo fiiro gaar ah iyo caawinta lagama maarmaanka xagga ardayda qabta baahida gaarka ah sida; curyaamada, naafada, laxaadka dhiman ee u baahan gacansiinta waxbarasho ee gaarka ah.